# DHOOL GAZETA

## DAWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA

DHOOOL. Gazeta waxaa soo saara
Golaha xildhibaanada Dawlada Degaanka
Soomaalida

BAYAAN TR15/1994

# BAYAANKA OGOYSIINTA DHAQAN GALKA DASTUURKA DIB LOO HABEEYEY EE DAWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAADAAMA, Shacabka Deegaanka Soomaalidu, wakiiladooda ay soo doorteen, ku ansixiyeen dastuurka dib loo habeeyey ee Dawlada Deegaanka Soomaalida Miyaasiya,1994; ayaa waxaa halkan lagu bayaamiyey sidan soo socota:

1. Cinwaan Gaaban.
   Bayaankan waxaa loogu yeedhayaa "Dastuurka Dib loo Habeeyey eeDawlada Deegaanka Soomaalida Bayaan Tr.15/1994"
2. Dhaqan Galka Dastuurka
   Dastuurka Dib loo habeeyey ee Dawlada Deegaanka Soomaalidu waxaa uu si buuxda u dhaqan galay una hirgalay Miyaasiya,1994
3. Bayaankani waa inuu dhaqan galaa Miyaasiya,1994

JIG JIGA, MIYAASIYA, 1994

C/RASHIID DUULANE RAFLE
MADAX-WAYNAHA DAWLADA
DEEGAANKA SOOMAALIDA

# ARAR

Shacabka Soomaaliyeed iyo Qawmiyadaha kale ee Dalkaba waxa ku habsaday Caddaadiskii kelidii taliska ahaa, kana cabudhiyey xuquuqaha dimoqraadiyadeed, isla markaana dhaqan-geliyey nidaam siyaasadeed, dhaqaale bulsho oo majaro habowsan taasoo horseeday fakhri iyo dib u dhac balaadhan Waxan aaminsanahay taliskii hore isla dalka gudihiisa inaanu ka ahayn muwaadinimada heerka labaad, inaanu arrintaasi hor istaagno, ku sii noolaanshaha silic iyo rafaad ayaa waxay tahay mid aan taageersanahay si aan soo noqod lahayn in loo saxo.

Halgankii ay muddada dheer ku soo jireen Qawmiyadaha iyo shucuubta kala gedisan ee dalka ee ay kaga qaadeen Xukuumaddii kelidii taliska ahayd, ayaa dhaxalsiisay muwaadiniinta dalka xuquuqda ismaamulka aayo-ka tashi illaa heer gu'itaan. Waxa kale oo lagu xaqiijiyey xuquuqaha aadamiga iyo kuwa kale ee dimoqraadiyadeed ee Qawmiyadaha iyo shucuubta kala gedisan ee dalka ku nool. Dalku inuu noqdo mid ku sifoobay saraynta sharci, fahamka nidaamka federaaliga ee dimoqraadiyadeed inuu yahay mid dedejinaya horumarkeena guud inagoo ku xisaabtamayna;

Anagoo ah Shacabka Soomaaliyeed maadaama oo aanu si adag u aaminsanahay horumar dhaqaale oo deg-ded ah, nabad-gelyo waarta iyo dimoqraadiyad adag in lagu gaadhi karo lahaan-shaha Dastuur gaar ahaaneed oo dhammaanba dhaqan-gelinaya xuquuqaha dhamaystiran ee Dastuuriga ah kuna salalaysan Das-tuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka.

Iyadoo aanu ka duulayno nidaamka Dimoqraadiyadeed ee

aan ku soo dooranay wakiilada golaha xildhibaanada ee Dasturka Deegaanka ee lagu shaqeeynayay ilaa hadda ansixiyay Hamle 10/ 1987 dii, ayaa Dastuurkan lagu muujiyay habayn isku dubaridan oo dawli ah oo lagu sameeyey dib u habayn qoto dheer. Gaar ahaan, arrimaha ku saabsan sidii kor looogu qaadi lahaa Nolosha xoolo dhaqatada, cadcaddaanta shaqada dowladda, masuuliyad u raacashada dadku uraacanayo wakiiladooda iyo qaab-dhismeedka haboon ee dawladda.

Ayaa gaba-gabadii halkan Maanta oo ay taariikhdu tahay Miyaasiya 1994tii Golaha xildhibaanadu kal-fadhigoodii 1[aad] ee caadiga ahaa oo ka dhacay magaalada Jig-jiga, Guddigii loo xilsaaray dib u habaynta Dastuurka markii ay na soo hordhigeen ee aanu si qoto dheer uga doodnay ayaanu cc ku ansixinay Dastuurkan.

## *CUTUBKA KOOWAAD*

## *QODDOBO GUUD*

### *Qod. 1aad.*

### *Magaca Dawladda*

Dastuurkani wuxuu dejinayaa qaab-dhismeed dimuqraadi ah, iyadoo taasi laga duulayana waxaa la dhisay dawlad lagu magacaabi doono; "Dawlada Deegaanka Soomaalida."

### *Qod. 2aad*

### *Xuduuda Deegaanka*

1. Deegaanka Soomaalidu wuxuu ka kooban yahay dhul isku xidhan oo ay degan yihiin umadda Soomaalida iyo cid kasta oo doorotay inay degaanka degaan;
   - Waxaa dhinaca waqooyi ka xiga, Degaanka cafarta iyo Dawladdaha Jabuuti iyo Soomaaliya;
   - Dhinaca koonfureed Dawladda Kiiniya;
   - Dhinaca Bari Dawladda Soomaaliya;
   - Dhinaca galbeedna Deegaanka Oromiya.
2. Iyadoo farqada laad ee qodobkan uu sidiisa yahay, haddana marka ay lagama maarmaan noqdaan isbeddelo xuduudeed waxaa lagu xallinayaa sida uu qabo Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya Qodobkiisa 48aad.

*Qod. 3aad*

*Calanka Dawladda Deegaanka*

Amended

Calanka Deegaanku waxaa uu u samaysan yahay qaab ka kooban midabo is hoos yaalla oo ugu sarreeyo cagaar, caddaan dhexda ah iyo casaanka oo ugu hooseeya. Xaga bidixdana waxaa ka soo gala saddex-gees buluug ah oo ay dhexda Kaga astaysan tahay xiddig cad oo shan gees ah.

*Qod. 4aad*

*Astaanta Deegaanka*

Amended

Astaanta Dawladda deegaanku waa labada calaamadood ee warshadaha iyo beeraha oo labada dhinac ku kala yaal xeedho korka fandhaal ku wadata Xiddig korka kaga samaysan wan madaxmadow oo xeedhada kudhex samaysan hoosta oo ay ku qoran tahay D.D.S.

*Qod. 5aad*

*Heesta Deegaanka*

Heesta Deegaanku iyadoo u taagan ujeeddooyinka dastuurka, taariikhda, dhaqanka iyo afka deegaanka iyo weliba himilada uu shacabka deegaanku u qabo in si dimoqaraadiyadi ku dheehan tahay uu ula noolaado dadyawga kale ee Itoobiya, muujinaysana rajada loo qabo horumarka umadda deegaanka, ayaa waxaa lagu caddeeynayaa xeer gooni ah.

*Qod. 6aad*

*Afka shaqo ee Degaanka*

Afka rasmiga ah ee shaqo ee deegaanku waa Af-soomaaliga.

*Qod. 7aad*

*Magaalo Madaxda Degaanka*

Magaalo madaxda degaanku waa Jig-jiga.

*Qod. 8aad*

*Jinsiga*

Dastuurkani qodobada uu luuqad ahaan labka u dhigayo, dhaddigana wuu u taagan yahay.

## *CUTUBKA LABAAD*

## *MABAADIIDA AASAASIGA AH EE DASTUURKA*

*Qodobka 9aad*

*Sarraynta Dadweynaha*

1. Awooodda sare ee dawladnimo waxa iska leh Ummadda Soomaalida.
2. Waxaa dadweynaha deegaanka sareyntooda u muujinaya wakiiladooda ay ku soo doortaan si waafaqsan dastuurka iyo ka qayb-qaadashadooda tooska ah ee hanaanka dimoqraadiga ah.

iyadoo la ilaalinayo sarraynta dastuurka dawladda federaalka ee Itoobiya;

1. Dastuurkani waa sharciga ugu sareeya deegaanka, fulitaan sharci ma yeelan karaan sharci, xeer dhaqameed ama go'aan kasta oo ay gaadheen hay'ado ama mas'uuliyin dawladdeed haddii ay ka hor imanayaan dastuurkan.

4. Dhammaan dadweynaha, hay'addaha dawliga, ururada siyaasadeed, isu tagyada dadweyne iyo hawl-wadeenadooduba waxa xil ka saaran yahay xurmaynta, hirgelinta iyo u hoggaansanaanta dastuurka.

3. Way reebban tahay in tab kasta oo ka baxsan qaab dastuurkani xeerinayo lagu hanto awoodda dawladnimo.

*Qod. 11aad*

*Xuquuqaha Aadamaha iyo Dimoqraadiyada*

1. Xuquuqda aadami iyo xorriyaadka la xidhiidha oo ka dhasha dabeecada bini'aadmi, waa kuwo aan lagu xad-gudbi karin amaba la dhiibi karin.

2. Xuquuqda bini'aadmi iyo dimooqraadiyadeed ee muwaadiniinta iyo dadweynuhuba waa kuwo ay tahay in la ixtiraamo lana xushmeeyo.

*Qod. 12 aad*

*Kala soocida Dawladda iyo Diinta*

1. Diinta iyo dawladdu way kala soocan yihiin
2. Diin dawli ah ma jirto.
3. Dawladdu ma faragelin karto diinta, sidoo kale Diintu ma faragelin karto dawladda.

*Qod. 13aad*

Hab-dhaqanka iyo la xisaabtanka Dawladda

1. Gudashada shaqooyinka dawladdu waa inay noqotaa si cad-caddaani ku dheehan tahay.
2. Sarkaal xil umaddeed haya ama Mudane la soo doortay wuuxuu mas'uul ka yahay ka soo bixid la'aanta xilka iyo waajibaadka saaran.
3. Hadday dadweynaha ka lunto kalsoonidii ay ku qabeen Mudane ay soo doorteen, waxay kala noqon karaan coodkoodii. Faahfaahintana sharciga ayaa xeerinaya .

## *CUTUBKA SADDEXAAD*
## *XUQUUQDA IYO XORRIYAADKA ASAASIGA AH*

*Qod. 14aad*

*Hirgelinta iyo Fasiraadda Dasruurka*

1. Hay'addaha xeer-dejinta, fulinta iyo kuwa garsoorku heer kastaba ha ahaadeene, waxay mas'uul ka yihiin, waajibaadna ka saaran yahay xurmaynta iyo dhaqan-

gelinta qoddobada ku xusan cutubkan.

2. Xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee ku cad Cutubkan waxa loo fasirayaa si waafaqsan mabaadi'da baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadamiga, heshiisyada iyo dukumentiga caalamiga ee lagu ilaalinayo xuquuqda aadamiga ee ay Itoobiya aqoonsatay.

## QAYBTA KOOWAAD
## <u>XUQUUQAHA AADAMIGA</u>

### *Qod. 15aad*

### <u>Xaqa Nolasha, Badbaadada Jidhka Qofka iyo Xorriyadda</u>

*Qof kasta wuxuu aadaminimadiisa xaq u leeyahay inuu noolaado, badbaadada jidhkiisa iyo xorriyad buuxda oo aan lagu xad-gudbi karin, lagana qaadi karin.*

### *Qod. 16aad*

### *<u>Xaqa nolosha</u>*

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu noolaado, qudh-gooyana laguma samayn karo haddaanu gaysanin dambi culus oo u dhigma oo sharcigu qeexay.

### *Qod. 17aad*

### *<u>Xaqa Nabad-qabka Jidhka Qofka</u>*

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inaan waxyeelo loo gaysan jidhkiisa.

*Qod. 18aa*

*Xaqa Xorriyadda*

1. Qofna lagama qaadi karo xorriyadiisa haddaanay jirin sabab waafaqsan qaab sharcigu dhigay.
2. Qofna looma xidhi karo si sharciga ka baxsan, lamana hayn karo iyadoon dambi lagu soo oogin ama la xukumin.

*Qod. 19aa*

*Reebanaanta ku Dhaqanka Falalka Aadminimada ka baxsan*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in aan loo ciqaabin si naxariis darro ah oo bini'aadminimada ka baxsan ama sharaftiisa wax u dhimi karta.
2. Qofna lama adoonsan karo, khasabna looguma shaqaysan karo, Waxaa reeban ujeeddo kasta ha lahaatee in laga ganacsado dadka.
3. qofna looma diri shaqo khasab ama sandulayn ah.
4. Qeexida ama ulajeedada farqada 3aad ee qodobkan "shaqo khasab ama sandulayn ah" kuma jiraan:–
   b) Shaqo ama adeeg kasta oo sharci ahaan looga baahan yahay qofku intuu xadhiga ku jiro ama looga dhigayo shuruud ka sii deyn xadhigiisa.
   t) Dadka damiirkoodu diido gudashada hawl ciidan dabadeed loogu beddelo shaqo kale.
   j) Adeeg walba oo loo baahdo marka lagu jiro xaalad deg-deg ah ama marka ay dhacdo masiibo khatar-gelinaysa nolosha iyo daryeelka beesha.

x) Dhaq-dhaqaaqa dhaqaale iyo horumar bulsheed oo iskaa wax u qabso ay bulsho uga hirgelinayso aag-geeda.

## *Qod. 20 aad*

## *Xuquuqda Dadka Xidhan*

1. Dadka la xidho waxay xaq u leeyihiin in isla markiiba lala socodsiiyo sababta xadhigooода iyo dacwadda lagu soo oogay. Taas oo loogu sheegayo luuqad ay garanayaan.
2. Dadka la soo xidho waxay xaq u leeyihiin inay aamusnaadaan. Marka la soo qabto, waxay xaq u leeyihiin in islamarrkaaba, luuqada ay garanayaan loogu sheego in hadalka ay yidhaahdaan loo istic-maali karo caddeyn lid ku ah oo la horkeeni karo maxkamadda.
3. Dadka la xidho waxay xaq u leeyihiin in 48-saacadood gudahood la horkeeno Maxkamadda. Wakhtigaas kuma jirto muddada caadi ahaan lagu gaadhayo maxkamadda la hor keenyao. Marka maxkamadda la horgeeyana waxay xaq u leeyihiin in si deg-deg ah loo siiyo faah-faahinta sababta xadhigooda oo ku salaysan dambiga lagu soo eedeeyey.
4. Haddii sarkaalka booliska ah ee soo xidhay ama sharci fuliyuhu ku guul-daraysto inuu ku keeno shakhsiyaadka xidhan Maxkamadda horteeda wakhtiga loogu talo-galay, oo uu sheegi waayo sababta xadhigooda, shakh-siyaadka oo dhami waxay xaq aan laga qaadi karin u

leeyihiin in ay cabasho gaystaan Maxkamadda si loo sii daayo. Haddii caddaalad ahaan loogu baahdo xadhigooda maxkamaddu way amri kartaa in rumaan ahaan lagu hayo ama Booliska lagu celiyo wakhti kooban, haddii la codsado si loo dhamaystiro baadhitaanka loo baahan yahay, go'aaminta wakhtiga dheeraadka ah ee baadhista maxkamaddu waxay xaqiijin in hay'addaha sharci fulinta mas'uulka ka ahi dhamaystiraan baadhista iyagoo tixgelinaysa xaqa qofka xidhani u leeyahay dhakhso u horgaynta maxkamadda.

5. Dadka la xidho laguma qasbi karo qirasho ama caddeyn loo adeegsado si ku lid ah. Caddeyn walba oo xoog ama khasab lagu helo waa wax kama jiraan, lamana aqbali karo.
6. Dadka la xidho waxay xaq u leeyihiin in lagu si daayo dammiin. Haseyeeshee duruufaha gaarka ah ee sharcigu tilmaamo maxkamaddu way diidi kartaa dammiinka amase codsan kartaa dammaanad qaad ku filan sii deynta qofka xidhan,.

## *Qod. 21aad*

## *Xuquuqda Eeddaysanaha*

1. Eeddaysaneyaashu marka dacwad lagu soo oogo kadib, waxay xaq u leeyihiin in wakhti maangal ah gudaheed lagu horkeeno Maxkamad sharciyeed oo rasmi ah oo dadweynaha u furan. Hase yeeshee; waxay maxkamaddu dood ka xidhan dadweynaha dhagaysan kartaa oo keliya iyadoo ilaalinysa xaqa dhinacyada ay dacwadu khusayso

u leeyihiin gaarnimo, akhlaaqda guud iyo bad-baadada qarameed.

2. Eeddaysaneyaashu waxay xaq u leeyihiin in loo sheego oo si tifatiran oo qoraal ah lagu siiyo dacwadda lagu soo oogay.
3. Eeddaysaneyaashu waxay xaq u leeyihiin, muddada dacwaddoodu socoto inaan loo arag dambiileyaal illaa inta danbigooda lagu caddeynayo sida sharcigu dhigayo iyo inaan lagu khasbin inay isku markhaati furaan.
4. Eeddaysaneyaashu waxay xaq u leeyihiin inay helaan caddeyn kasta oo lagu oogay, su'aalo waydiinta markhaatiyaasha lidka ku ah inay soo bandhigaan ama loo soo bandhigo caddeymo xoojiya difaacooda iyo weliba in loo dhegaysto markhaatiyaashooda.
5. Eeddaysaneyaashu waxay xaq u leeyihiin inay qab-sadaan qareen. Haddiise ay awood u waayaan, lagana yaabo in caddaalad darro ka dhalato, waxay xaq u leeyihiin in dawladdu u qabato qareen.
6. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu go'aanka ama xukunka maxkamadeed uga qaato rafcaan maxkamad kale oo awwod racfaan leh.
7. Haddii doodu ay maxkamadda kaga socoto luuqad aanay eedaysaneyaashu garanayn, waxa ay xaq u leeyihiin inay codsadaan in kharashka dawladda loogu turjumo doodda.

*Qod. 22aad*

*Xuquuqda Maxaabiista Garsugeyaasha ah iyo kuwa Xukuman*

1. Maxaabiista garsugeyaasha ah iyo kuwa xukuman, waxay xaq u leeyihiin dhawrista xishmadooda qofnimo.
2. Waxay xaq u leeyihiin helida fursad ay kula soo xidhiidhaan ama ay ka soo booqdaan xaasaskooda, nimankooda, kuwa ay wada joogaan, ehelkooda, saaxiibadood, culumaa'udiinka, dhakhaatiirta iyo qareenadooda.

*Qod. 23aad*

*Dib-u-noqosho la'aanta Xeerka Ciqaabta*

1. Qofna dambiile kuma noqon karo fal uu galay ama uu gudan waayey oo amminta uu sameeyey aan dambi ku ahayn sharciga. Qofna laguma ciqaabi karo mid ka culus ciqaabtii uu sharcigu u gooyey dambiga markii uu galay.
2. Iyadoo aan laxeerinayn sida ku cad farqada laad ee qodobkan, ayaa haddana sharciga gadaal laga sameeyaa oo u danaynaya eeddaysanaha ama xukumanaha loo cuskan karaa.

### *Qod. 24aad*
### ***Reebanaanta laba Jeer Ciqaabka Fal-dambiyeed Qudha***

Qofna mar labaad laguma ciqaabi karo, lagumana eeddayn karo fal-dambiyeed uu horey ugu mutaystay go'aan kama dambays ah "Lagu xukumay ama lagu sii daayey," sida ku cad xeerka iyo habka ciqaabtaba.

### *Qod. 25aad*
### *Xaqa Sharafta iyo sumcadda*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la xurmeeyo sharaftiisa iyo sumcaddiisa qofnimo.
2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay horumarinta qof-nimadiisa si barbar socota xuquuqda muwadiniinta kale.
3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay tixgelin iyo maamuus qofnimo meel kasta oo uu joogaba.

### *Qod. 26aad*
### *Xaqa Sinnaanta*

Dadka oo dhami sharciga hortiisa way u siman yihiin, waxayna xaq u leeyihiin inaan lagu kala takoorin difaaca sharcigu siinayo. Wuxuu sharcigu dadkoo dhan ka siina-yaa arrintan difaac siman oo meelmar ah oo aan lagu kala takoorin tafiir, qoowmiyad, shacbi, dabaqad, midab, jinsi, luuqad, diin, mab'da siyaasadeed ama ra'yi-yeed, hanti, dhalasho ama darajo kale.

### *Qod. 24aad*

### ***Reebanaanta laba Jeer Ciqaabka Fal-dambiyeed Qudha***

Qofna mar labaad laguma ciqaabi karo, lagumana eeddayn karo fal-dambiyeed uu horey ugu mutaystay go'aan kama dambays ah "Lagu xukumay ama lagu sii daayey," sida ku cad xeerka iyo habka ciqaabtaba.

### *Qod. 25aad*

### *Xaqa Sharafta iyo sumcadda*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la xurmeeyo sharaftiisa iyo sumcaddiisa qofnimo.
2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay horumarinta qofnimadiisa si barbar socota xuquuqda muwadiniinta kale.
3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay tixgelin iyo maamuus qofnimo meel kasta oo uu joogaba.

### *Qod. 26aad*

### *Xaqa Sinnaanta*

Dadka oo dhami sharciga hortiisa way u siman yihiin, waxayna xaq u leeyihiin inaan lagu kala takoorin difaaca sharcigu siinayo. Wuxuu sharcigu dadkoo dhan ka siinayaa arrintan difaac siman oo meelmar ah oo aan lagu kala takoorin tafiir, qoowmiyad, shacbi, dabaqad, midab, jinsi, luuqad, diin, mab'da siyaasadeed ama ra'yi-yeed, hanti, dhalasho ama darajo kale.

## Qod. 27aad

## Xaqa Nolosha Gaar ahaaneed

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay noloshiisa gaar-ahaaneed oo ay ka mid yiihiin inaan qofka gurigiisa, hantidiisa iyo naftiisa la iska baadhin, ama hanti uu haysto layska qaadanin.
2. Qofna laguma xad-gudbi karo qoraalada u gaarka ah, diraaladiisa boosaha iyo xidhiidhadiisa uu sii mariyo telefoonada, qalabka isgaadhsiinta iyo tan elektaroonikada ah.
3. Saraakiisha dawladda waxa xilka saaran yahay xurmayn ta iyo ilaalinta xuquuqahan. Lama xaddeyn karo ka faa'iidaysiga xuquuqahan, haddaanay jirin duruufo khas-baya iyo sharciyo gaar ah oo ku wajahan daryeelka bad-baadada guud ee qaranimo, nabadda guud, ka hortagidda dambiyada, ilaalinta caafimaadka, iyo anshaxa guud ama xuuquuqaha iyo xorriyaadka ay dadka kale leeyihiin.

## Qod. 28aad

## Xaqa Diinta, Caqiidada iyo Ra'yiga

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyad fikir, damiir iyo mid diineedba. Xaqaas waxa ka mid ah xorriyadda in qof qaato diinta ama caqiidada uu iskii u doorto, uuna keli ahaantii ama wadar ahaan u muujiyo diinta ama caqiidada uu qaatay, una caabudo si ficil iyo baridba ah.
2. Cid kasta oo diin haysata si ay diintooda u fidiso caqiidadoodana u dhisto waxaa loo fasaxayaa in ay

samaysan karaan dugsiyo Diini ah iyo hay'addo Maamul Diineed ahba, iyadoo aan lagu xad-gudbaynin farqada labaad ee Qodobka 90aad ee Dastuurka Federaalka.

3. Qofna laguma jujuubi karro, ama habab kale looma adeegsan karo si loo xakameeyo xorriyadiisa uu ku haysanayo caqiidada uu doortay.
4. Waalidka iyo Ilaaliyeyaasha sharciga ah ee caruurta waxay xaq u leeyihiin inay ubadkooda ku soo koriyaan wax-barasho diintooda iyo akhlaaqdooda waafaaqsan.
5. Xorriyadda cabiraada diinta ama caqiidada waxa xaddeyn kara oo keliya shuruucda loo soo saaroo in lagu ilaalinayo amniga dadweynaha, nabad-gelyada, caafimaadka, wax-barashada, akhlaaqda dadweynaha, ama xuquuqda aasaasiga ah iyo madax banaanida muwaadiniinta kale iyo xaqiijinta kala madax-banaanida diinta iyo dawladda.

## *Qod. 29aad*
## *Dambiyada laga Galo Aadamiga*

Jiritaanka dambiyo bini'aadminimada laga galay, sida ku qeexan heshiisyada caalamiga ah ee Itoobiya saxiixday iyo shuruucda kalee ee dalka oo ay ka mid yihiin gumaadka, dilka maxkamad la'aaneed, af-duubid, jidh dil ma qaban karo sharciga mudo dhaafku. Dambiyadani ma geli karaan cafis madaxweyne, gooleyaasha xeer dejinta amaba hay'addaha kale ee dawladdu bixiyaan.

Qod. 30 - 44.

## *QAYBTA LABAAD*

## *XUQUUQDA DIMOQRAADIYADEED*

### *Qod. 30aad*

### *Xaqa Fikirka, Ra'yiga iyo Hadalka*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu qaato fikirka uu doono si faragelin la'aan ah.
2. Qof kasta wuxuu xor u leeyahay dhiibashada ra'yigiisa si faragelin la'aan ah. Xaqaas waxa ka mid ah raadinta, gudbinta iyo helida wararka iyo fikir kasta oo kale, qoraal ahaan, daabacaad, hab-suugaaneed ama hanaan kasta oo uu isagu door bido, iyadoon loo xaddeyn dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.
3. Xorriyadda saxaafadda ama qalabka kale ee war--baahineed iyo xorriyadda hal-abuurka dhaqameed waa mid dammaanad qaadan. Xorriyada saxaafada waxaa si gaar ah uga mid ah;
   b) Reebanaanta nooc kasta oo faafreeb-ah.
   t) fursad u helida wararka saamaynaya danaha dadweynaha.
4. Iyadoo laga duulayo ujeeddada isku-gudubka ama isweydaarsiga xogaha, fikradaha iyo aragtiyadaba oo aasaas u ah dhaqan-galka nidaamka dimoqraadiga ah wuxuu sharcigu saxaafada hay'ad ahaan u siinayaa ilaalin sharciyeed, taas oo sugaysa hawl-galkeeda xorta ah iyo awooda ay ku hanan karto aragtiyada kala duwan.
5. Hay'addaha warbaahineed ee dawladdu maamusho ama ay maal-geliso waxay ku shaqaynayaan hab suurta

galinaya cabbiraadda rayiyada kala gedisan ee bulshada dhexdeeda ka jira.

6. Xuquuqaha kor ku xusan waxa xaddeyn kara oo keliya shuruuc ku dhisan in madax-banaanida fikirka iyo wararkaba aan la xaddidin iyada oo loo eegayo nuxurka ama saamaynta aragtida qof sheegay. Xaddeynta shar-ciyeed waxay ku salaysan tahay ilaalinta suubanaan-shaha dhalinta iyo sharafta iyo sumcadda shakhsiyadeed. Dacaayad kasta oo dagaal iyo sidoo kale muujin fikrado guud oo loola jeedo in lagu dhaawaco karaamada bini'aadamka way ku reeban yihiin sharciga.
7. Muwaadin kasta oo ku xad-gudba xaddeynta isticmaalka xuquuqaha kor ku xusan waxa lala tiigsanayaa sharciga.

*Qod, 31aad*

*Xaqa Isku-imaatinka, Banaanbaxa iyo Cabashooyinka*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu isaga oo aan hubaysnayn si nabad-gelyo ah dad kale ula shiro, ulana banaan baxo, una gudbiyo cabashadiisa. si Shirarka guryaha dibadooda ah iyo banaan-baxyaduba aanay meelaha laga wado dhibaato ugu gaysan dhaq-dhaqaaqyada dadweynuha wada in la ilaaliyo nabad gelyada, akhlaaqda guud iyo xuquuqaha dimoqraadiga ah.
2. Xaqani qofna kama bad-baadinayo in loo qabsado falkiisa iyadoo loo cuskanayo qawaaniinta loo soo saaray ilaalinta suubanaanta dhalinyarada, sharafta iyo sumcada

shakhsiyaadka iyo shuruucda mamnuucaysa abaabul dagaal iyo cabiraada ra'yiyada ku wajahan dhimida sumcada bini'aadamka.

*Qod. 32$^{aad}$*

*<u>Xorriyadda Is-abaabulida</u>*

Qof waliba wuxuu xor u yahay inuu hadaf kasta awgii urur ahaan iskugu abaabulo. Waxa reeban jiritaanka ururrada loola jeedo inay ku xad-gudbaan qawaaniinta dalka u degsan ama si sharci darro ah u burburinaya nidaamka dastuuriga ah ama kuwa taageera falalkaas.

*Qod. 33$^{aad}$*

*<u>Xorriyadda Socodka</u>*

Iyadoo uu sidiisa yahay qodobka 32aad ee Dastuurka federaalka, qof kasta oo muwaadin ah ama si sharci ah degaanka ku jooga wuxuu xor u yahay inuu tago meel kasta oo degaanka ka tirsan, guri ka dhisto, ka shaqaysto, hanti ku yeesho iyo weliba inuu xilliguu doono degaanka ka tago.

*Qod. 34$^{aad}$*

*<u>Xuquuqda Shakhsiyeed, Qoyseed iyo Guurka</u>*

1. Ragga iyo Haweenka gaadhay da'da guurka ee sharcigu xeeriyey waxay xaq u leeyihiin inay is-guursadaan, iyagoo aan lagu takoorin isir, qowmiyad ama diintoona.

Waxayna xaq siman u leeyihiin dhaqan gelinta guurka, muddada ay is qabaan iyo wakhtiga furitaanka. Waxa la xeerin doonaa sharciyo lagu xaqiijiyo ilaalinta xuquuuqda iyo danaha caruurta wakhtiga furitaanka.

2. Guurka waxa lagu aasaasaa oo qudha madax-banaanida iyo rabitaanka buuxa ee labada qof ee is-guursanaya.
3. Qoysku waa unugga dabiiciga ah oo aasaas u ah bulshada, sidaas awgeedna waa inuu helaa dhawrista buuxda ee bulshada iyo dawladdaba.
4. Iyadoo uu scharcigu u faah-faahin doono si gaar ah waxa loo soo saari karaa qawaaniin aqoonsata guurka lagu dhameeyo si waafaqsan diinta iyo habka xeer-dhaqameedka.
5. Dastuurkani ma diidana in khilaafyada la xidhiidha qof iyo qoys lagu xaliyo Diinta iyo Xeer-dhaqameedyada haddii ay ogol yihiin dhinacyada is khilaafsan. Faah-faahin-teedana waxa xeerin doona sharci.

## Qod.35aad

## Xuquuqda Haweenka

1. Haweenku way ula siman yihiin ragga wixii ku saabsan adeegsiga xuquuqaha iyo daryeelka uu xaqiijiyey dastuurkani.
2. Sida dastuurkani xeerinayo waxay haweenku dhinaca guurka ragga la leeyihiin xaq siman.
3. Iyadoo la tixgelinayo yasidii iyo takooridii noqotay dhaxalka taariikheed ee haweenka, si loo helo sixitaan

arrintaas la xidhiidha, waxay xaq u leeyihiin inay helaan tallaabooyin taageero oo dheeraad ah oo ay ka faa'iidaystaan. Hadafka tallaabooyinkaasi wuxuu noqonayaa mid dhinacyada siyaasada, bulshada, dhaqaalaha iyo dhismayaasha kale ee dawladda iyo kuwa gaar ahaaneedba haweenku uga qayb-qaataan, kuna helaan tixgelin gaar ah oo u suurto-gelisa inay si siman ula tartamaan ragga.

4. Dawladdu waa inay dhaqan-gelisaa xaqa haweenku u leeyihiin inay ka xoroobaan dhaqammada Xun ee waxyeelaynaya. Xeerarka, Dhaqamada iyo Caadooyinka haweenka u keenaya cadaadis iyo waxyeelo gaadha jidhkooda ama damiirkoodaba way reeban yihiin.

5. Haweenku waxay xaq u leeyihiin:-
   - b) Fasaxa dhalmada iyo mushahaarkooda oo buuxa. Muddada fasaxa dhalmada waxa xeerin doona qaanuun tixgelinaya dabeecada hawsha ay qabtaan, caafimaadkeeda, kan ilmaha iyo bad-baadada qoyska ba.
   - t) Fasaxa dhalmada ee sharcigu u gooyey mushahar dhan waxa raacsanaan kara fasaxa dhalmada ka hor ah.

6. Haweenku waxay xaq buuxa u leeyihiin in lagala tashado qorshaynta siyaasadaha horumarineed ee deegaanka, habaynta iyo fulinta mashaariicda, gaar ahaan kuwa saamayn toos ah ku leh nolosha haweenka.

7. Haweenku waxay xaq u leeyihiin inay yeeshaan hanti, maamulaan, kormeeraan, adeegsadaan oo ay gudbiyaan. gaar ahaan waxay ragga kala siman yihiin adeegsiga, gudbinta, maamulida iyo kormeerida dhulka. Waxay xaq u leeyihiin in si

siman loo arko xaqa ay dhaxalka u leeyihiin.

8. Haweenku waxay xaq la siman ka ragga u leeyihiin arrimaha shaqaaleynta, dalacaada, mushaharka iyo gudbinta xaqa hawl-gabnimo.
9. Haweenku si ay uga hortagaan dhibaatooyinka ka soo gaadha uurka iyo dhalmada, isla markaana ay u ilaaliyaan caafimaadkooda, waxay xaq u leeyihiin in loo fidiyo wax-barashada qorshaha qoyska, la socodsiin arrintaas khuseeysa iyo daryeel.

## Qod.36aad
## Xuquuqda Caruurta

1. Ilma kasta wuxuu xaq u leeyahay
   - b) Noloshiisa;
   - t) Magac iyo dhalasho;
   - j) Aqoonsi iyo daryeel ay ka helaan waalidiintooda ama mas'uulkooda sharciyeed;
   - x) In aan falal ka faa'iidaysi lagula kicin, lagana codsan ama sandulayn shaqo khatar ku ah waxbarashadooda, caafimaadkooda iyo daryeelkooda guud.
2. Arrimaha khuseeya caruurta ee ay fuliyaan hay'addaha dawladda, kuwa gaarka ah, maxkamaddaha sharciga, hay'ad-daha maamul ama xeer-dejineed, waxay wadar ahaantood ahmiyad weyn siinayaan maslaxada caruurta.
3. Ubadka dambiyo ay galaan loo geeyo goobaha dhaqan-toosinta, iyo kuwa la geeyo goobaha dawladda ama kuwa gaar ee xanaanaynta agoonta loogu talo-galay, way ka reeban tahay in dad waaweyn la joogo ama kula noolaado.

4. Caruurta aan guur ku dhalanin waxay la xuquuq yihiin kuwa guurka ku dhasha.
5. Dawladdu waxay agoonta u fidinaysaa daryeel gaar ahaaneed, waxayna dhiiri-gelinaaysaa sidii ay u dhismi lahaayeen hay'addo u gogol xaadha nidaam lagu fidiyo korsashadooda, waxbarashadooda iyo weliba daryeelka caafimaadkooda.

## Qod.37aad
## Xaqa Helitaanka Caddaalada

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu arrimaha ama dhac-dooyinka mudan u gudbiyo maxkamad ama hay'addii kale ee sharci ahaan awood garsoor uleh. Isla markaana uu helo go, aan ama xukun.
2. Go'aanka ama xukunka lagu xusay farqada laad ee qodobkan waxa kaloo raadsan kara:-
   b) Urur kasta isagoo ka wakiil ah danaha guud ama kuwa gaar ahaaneed ee xubnihiisa.
   t) Koox kasta ama shakhsiyaadka isku danta ah wakiilkooda.

## Qod.38aad
## Xaqa cod-bixinta iyo doorrashada

1. Muwaadin kasta oo Itoobiyaan ah isagoon lagu takoorin midab, Qawmiyad, Qabiil, Jinsi, Luuqad, Diin, Siyaasad, Ra'yi ama darajo kaleba, wuxuu xaq u leeyahay:-
   b) Inuu ka qayb-galo arrimaha maamulka dadweynaha isagoo u sii maraya wakiiladiisa uu sida tooska ah ee xorta ah u soo doortay.

t) Inuu si sharci ah u cod bixiyo markuu gaadho 18 jir

j) Inuu heerarka kala duwan ee doorashooyinka dawladda wax doorto, isagana la doorto, doorashooyinkaas oo ah kuwo dadkoo dhan saameeya, isla markaana dammaanad qaadaya nidaam cod-bixineed oo qarsoodi ah oo uu qofku rabitaankiisa si madax banaan ugu cabiri karo.

2. In la xurmeeyo xaqa uu qof walba u leeyahay inuu isagoo buuxinaya dhammaan shuruucda guud iyo kuwa gaar ahaaneedba rabitaankiisa xubin kaga noqdo axsaabta siyaasedeed, ururada shaqaalaha, ganacsiga iyo kuwa xir-fadeedba.

3. Doorashooyinka jagooyinka mas'uuliyadeed ee ururada ku cad farqada 2$^{aad}$ ee qodobkan waxay u dhacayaan si madax banaan oo dimuqraadi ah.

4. Sida ku xusan farqada 2$^{aad}$ iyo 3$^{aad}$ ee qodobkan, waxa kale oo lagu dabaqayaa hay'addaha madaniga ah ee saamaynta balaadhan ku leh danaha dadweynaha.

## Qod.39$^{aad}$

## Xuquuqda Qawmiyada Soomaalida

Wuxuu dastuurkani Qawmiyada Deegaanka Soomaalida u xaqiijinayaa sida ku cad qodobka 39$^{aad}$ ee Dastuurka Federaalka Itoobiya xaqa aaya-ka-talinta illaa heer gu'itaan. Sidaa darteed shacabka soomalidu:-

1. Wuxuu xaq u leeyahay inuu ku hadlo, qoro, kuna shaqaysto afkiisa, uuna kobciyo dhaqankiisa, isla markaana daryeelo taariikhdiisa iyo hiddihiisa.

maamulo, una go'aamiyo arrimihiisa, isla markaana si dheelli tiran oo caddaalad ah uga qayb-qaato dawladda Federaalka.

3. Shacabka Soomaalidu xaqa uu u leeyahay inuu iskii isku maamulo waxaa loola jeedaa inuu deegaankiisa ka dhisto maamul u gaar ah si dheeli-tiranna uu wakiilo ugu yeesho dawladda Federaalka.

4. Xaqa Qawmiyadu u leedahay inay aayaheeda ka tashato illaa heer gu'itaan wuxuu dhaqan-galayaa;

   b) Marka la hubiyo in codsiga gu'itaanka Qawmiyadu haysato taageerada 2/3 (Saddex dalool labo) codka golaha xil-dhibaanadooda.

   t) Marka dawladda federaalku qaban-qaabiso afti dhici doonta saddex sanno gudahood kadib, marka uu soo gaadho go'aanka gu'itaanka ee golaha xil-dhibaanada.

   j) Marka codka aftida dadweynaha intiisa badani taageerto go'aanka.

   x Marka dawladda federaalku ku wareejiso awoodaheedii golaha xil-dhibaanada qawmiyada ee gu'itaanka u codeeyey.

   kh) Marka hantida loo qayb-sado si sharciga waafaqsan.

5. Dastuurkan gudihiisa ''Qawmiyad'' waxa loola jeedaa beelo wadaaga sansaan uu si balaadhan uga muuqdo dhaqan ama hidde ay ku midaysan yihiin, waana kuwa leh luuqad ay isku af gartaan ama aaminsanaan iyo nafsiyad midaysan, isla markaana ku nool deegaan sida qaalibka ah xidhiidhsan.

## Qod.40aad

## Xaqa lahaanshaha

1. Muwaadin kasta waa in loo xurmeeyo xaqa lahaanshihiisa hanti gaar ahaaneed. Haddaan sharcigu u tilmaamin si kale, isagoo xeerinaya dan guud, xaqaas waxa ka mid ah: yeelashada, isticmaalka iyo iyadoo la jaanqadaysa xuquuqda muwaadiniinta kale inuu gado, dhaxal u bixiyo ama u wareejiyo siyaabo kale.
2. Hanti gaar ahaaneed sida qodobkani qabo waxay noqonaysaa: wixii muuqda ama aan muuqan ee manaafacaad iyo qiimo leh oo ku dhasha shaqo, dadaal ama maal-gelin muwaadin shakhsi ahi sameeyey ama marka ay haboon tahay ururo isu taga oo leh jiritaan sharciyeed ama isku tagyo dadeed oo sharcigu awood u siiyey lahaansho hanti.
3. Xaqa lahaanshaha dhulka miyi iyo magaalo iyo weliba khayraadka dabiiciga ah waa mid u gaar ah dawladda iyo dadweynaha. Dhulku waa hanti guud oo ka dhaxaysa Qawmiyada Deegaanka oo aan la iibin karin, lana wareenjin karin.
4. Xoolo-dhaqatada deegaanku waxay xaq u leeyihiin in ay helaan dhul daaqsimeed ama beerasho iyo in aan laga caydhin dhulka ay ku nool yihiin. arrintanna sharciga ayaa Xeerin-doona.
5. Beeralayda deegaanku waxay xaq u leeyihiin helidda dhul aan lacag laga bixin iyo ka ilaalinta in laga caydhiyo dhulkaas. Hirgalinta arrintanna sharciga ayaa xeerin doona.
6. Iyadoon laga hor imannaynin xaqa qawmiyada ee lahaanshaha dhulka, dawladdu waxay sugaysaa xaqa dadka maal-geliyeyaasha ahi u leeyihiin isticmaalka dhulka, taas oo ku

salaysan lacag bixin sharcigu dejiyey. Faah faahinta arrintanna waxa xeerin doona sharciga.

7. Qof kasta oo deegaanka ah wuxuu xaq u leeyahay hantida maguurtada ah ee uu dhisto iyo inuu muruqiisa ama maalkiisa si joogto ah ugu hagaajiyo dhulka. Xaqaas waxa ka mid ah inuu hantidiisa cid kale ku wareejiyo, inuu dhaxal u bixiyo, iyo haddii xaqa isticmaalka dhulka ka dhamaado inuu hantidiisa ka qaato, inuu magaciisa ka beddelo ama inuu mag-dhaw waydiisto. Faah-faahinta arrintaasna waxaa lagu xeerin doonaa sharciga.
8. Iyadoo aan lagu xad-gudbayn xaqa hantida gaar ahaan loo leeyahay, dawladdu way la wareegi kartaa hanti gaar ahaaneed oo dan guud loogu baahdo, iyadoo magdhaw qiimaha hantidaas u dhiganta qaddimaysa.

## Qod. 41aad
## Xuquuqda Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqameed

1) Qof kasta oo deegaanka ah wuxuu xaq u leeyahay inuu si xor ah u galo dhaq-dhaqaaq dhaqaaleed, ugana shaqaysto shaqada uu doorto meel kastoo degaanka gudihiisa ah.
2) Qof kasta oo deegaanka ah wuxuu xaq u leeyahay doorashada tubta noloshiisa, shaqada iyo xirfadda shaqo.
3) Dadka deegaanka ah waxay dhammaantood xaq siman u leeyihiin helitaanka adeegyada bulshada ee dawladda deeganku bixiso.
4) Si ay dadweynaha deegaanka gaar ahaan hab xoolo dhaqatada u faa'iidaynaya ugu fidiso adeegyo biyo, caafimaad, wax-

barasho iyo adeegyada bulsho ee kale, dawladda deegaanka waxaa saaran mas.uuliyad ay ugu qoondaynayso miisaaniyad mar walba korodha.

5) Dawladda deegaanka waxaa xil ka saaran yahay inay xoolo dhaqatada iyo beeralayda deegaanka u sahasho inay helaan adeegyada deynta, waddooyinka, suuq-geynta iyo weliba kaabeyaasha dhaqaale ee kale si ay uga faa'iidaystaan horumarinta khayraadka xoolahooda.

6) Dawladda deegaanka waxay dadka naafada ah, dadka da'da ah iyo caruurta waalid ama cid korisa aan lahayn u daryeeshaa, una caawisaa hadba sida ay u saamaxdo awooda dhaqaale ee deegaanku.

7) Dawladu waa inay ku socoto siyaasad u suurto-gelisa inay shaqooyin u abuurto dadka shaqada la'iyo kuwa saboolka ahba, waxayna dejisaa qorsheyaal shaqo iyo mashaariic ay ka dhex abuurto fursado shaqo.

8) Dawladu waa inay qaado tallaabooyinka lagama maar maanka ah ee Muwaadiniintu Shaqo Fa'iido leh ku heli karaan.

9) Xoolo-dhaqatada iyo beeralayda deegaanku waxay xaq u leeyihiin inay helaan nolol mar walba hagaagaysa iyo inay qiimo maangal ah ku helaan dadaalka ay ugu jiraan kobcinta khayraadka deegaanka iyo wax soo saarkoodaba. Dawladda deegaankuna waa inay yool ka dhigato bartilmaameedkaas marka ay dejinayso siyaasadaheeda horumarinta, dhaqaalaha iyo bulshadaba.

10 Dawladda waxa saaran mas'uuliyada ilaalinta iyo kaydinta dhaxalka taariikheed iyo dhaqameed ee loogu adeegayo kor-u-qaadida suugaanta iyo ciyaaraha.

## Qod. 42[aad]

## Xaqa shaqaalaha

1. (b) Shaqaalaha adeegga iyo warshadaha, beeraleyda, shaqaalaha beeraha, shaqaalaha kale ee miyiga ku sugan iyo shaqaalaha dawladda ee heerkooda shaqo u Oggolyahay iyo kuwa aan haynin mas'uuliyad muuqata waxay xaq u leeyihiin inay dhistaan ururo si ay u wanaajiyaan xaaladahooda shaqo iyo kuwooda dhaqaaleba. Xaqaas waxaa ka mid ah abuurida ururo shaqaale ama iskaashiyo kale oo si wadajir ahaaneed shaqaaluhu ugula gorgortamayaan cidda ay u shaqeeyaan ama hay'addihii kale ee noloshooda saameyn ku leh.

   (t) Noocyada shaqaale ee (b) ku xusan waxay xaq u leeyihiin inay cabiraan cabashooyinkooda, isla markaana shaqo joojin samayn karaan.

   (j) Shaqaalaha dawladda ee ka faa'iidaysan kara xuquuqda ku cad xubinta (b) iyo (t) waxaa xeerin doona sharciga.

   (x) Shaqaalaha haweenka ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan mushahar u dhigma shaqada ay qabtaan.

2. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan saacado shaqo oo si macquul ah loo xaddiday, xilliyo fasax, maalmo nasasho iyo ciido oo uu intaba mushaharkoodu u socodo. Sidoo kale, waa inay helaan deegaan shaqo oo ku habboon nadaafadooda, caafimaadkooda iyo nabad-qabkooda.

3. Iyadoo aan lagu xad-gudbayn xuquuqaha farqada [laad] ee qodobkan ku xusan, shuruucda loo soo saaro hirgelinta xuquuqahan ayaa xeerin doona nidaamyada lagu aasaasayo ururada shaqaale iyo xeerinta habka gorgortanka wadaagga ah.

## Qod. 43[aad]

## Xaqa Horumarka

1. Dadka deegaanku gebi ahaantood waxay xaq u leeyihiin kor u qaadidda heerarka noloshooda iyo horumarin joogto ah ama waari karta.
2. Muwaadiniinta deegaanku waxay xaq u leeyihiin ka qayb-qaadashada horumarka guud ee deegaanka iyo in lagala tashado siyaasadaha iyo mashaariicda noloshooda saameynta ku leh.
3. Ujeedooyinka asaasiga ah ee dhaq-dhaqaaqyada horumarineed waa inay kor u qaadaan awoodda muwaadiniintu kaga qayb-qaadanayaan horumarka iyo xalinta baahidooda asaasiga ah.

## Qod. 44[aad]

## Xuquuqda Deegaanka

1. Dhammaan muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin deegaan nadaafad iyo caafimaadba leh.
2. Dadyawga ku barakaca amase noloshooda saamayn xun ay ku yeeshaan mashaariicda dawladda deegaanku ka fulinayso aaggooda, waxay xaq u leeyihiin magdhaw maaliyadeed ama siyaabo kaleba loogu mag-dhabo oo ay weheliso in kaalmo dawladeed loogu raro goob cusub.

# CUTUBKA AFRAAD

# QAAB-DHISMEEDKA IYO QAYBSANAANTA AWOODDA DAWLADDA DEEGAANKA

## Qod. 45^aad

### Heerarka Kala Duwan ee Maamulka Dawladda Deegaanka

Qaab-dhismeedka Dawladda deegaanku wuxuu ka koobnaanayaa maamullada Tuulooyinka, Degmooyinka ama magaalooyinka, iyo deegaanka. Iyadoo ay sidaas tahay, ayaa haddana Golaha Deegaanku samaysan karaa qaabdhismeedyo maamul oo kale, awoodahooda iyo waajibaadkoodana sharci ku xeerin karaa.

## Qod. 46^aad

### Qaybaha Awoodaha Dawladda Deegaanka

1. Golaha xildhibaanada Dawladda Deegaanku waa qaybta sharci dejinta isla markaana ah hay'adda ugu saraysa, wuxuuna hoos-tagayaa dadweynihii soo wakiishay.
2. Qaybta sharci-fulinta ee deegaanku waxay noqonaysaa Golaha fulinta waxayna hoos-tagayaan Golaha Xil-dhibaanada.
3. Awoodda Garsoor ee deegaanka waxaa iska leh Maxkamadaha deegaanka oo keliya.

## Qod. 47^aad

### Awoodaha iyo Waajibaadka Dawladda Deegaanka

1. Awoodaha iyo waajibaadka Dastuurka Federaalku si cad oo gaar ah Dawladda federaalka u siiyey ama si wada jir ah u siiyay Dawladda fedeeraalka iyo Deegaanka, wixii ka baxsan

waxaa iska leh Dawladda deegaanka.

2. Qodobkan farqadiisa 1[aad] sida ku cad iyadoo sideeda loo tixgelinayo Dawladda deegaanku:

   b) Waxay dajisaa, fulisaana qorshaha, istiraatijiyada iyo siyaasadda horumarka dhaqaale iyo tan bulsho ee Dawladda deegaanka;

   t) Waxay soo saartaa, fulisaana Dastuurka iyo xeerarka kale ee Deegaanka;

   j) Waxay iyadoo raacaysa xeerarka Dawladda Federaalku soo saarto maamushaa dhulka iyo khayraadka dabiiciga ah;

   x) Waxay dhisaysaa Dawlad Deegaan oo ku salaysan mabaadi'da ismaamul, waxayna isla markaa abuurtaa nidaam dimuqraadiyadeed oo ku dhisan sarraynta sharciga. Waxay ilaalisaa difaacdaana Dastuurka Dawladda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya iyo ka degaanka;

   kh) Waxay soo saartaa, fulisaana sharci la xidhiidha xaaladaha maamulka iyo shaqada ee shaqaalaha deegaanka. Marka hawshan la fulinayana waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa shuruudaha waxbarasho, tababarada iyo waaya aragnimada ee dalka;

   d) Waxay dhisaysaa, hoggaaminaysaana ciidanka booliska, waxayna ilaalisaa nabadgalyada iyo xasilloonida degaanka;

   r) Iyadoo la tixgelinayo Dastuurka Dawladda Federaalka Itoobiya qodobkiisa 28[aad], waxay si sharci ku salaysan u bixisaa cafis ama saamaxaad;

   s) Waxay canshuur ku soo rogtaa uruurisaana ilaha dakhliga degaanka; Waxay diyaarisaa, ansixisaa, maamushaana, miisaaniyadda Degaanka;

sh) Waxay canshuur ka uruurisaa shaqaalaha Dawlada Degaanka iyo kuwa ururada kaleba;

dh) Waxay go'aamisaa, ururisaana canshuurta kafaa'iidaysiga dhulka;

c) Waxay soo saartaa, ururisaana canshuurta dakhliga beeraha;

g) Waxay canshuur saartaa dakhliga ka soo baxa guryaha iyo hantida gaarka ah ee deegaanka, waxaa kale oo ay kiro saartaa, kana uruurisaa guryaha iyo hantida kale ee dawladda.

f) Waxay saaraysaa kana uruurisaa macaashal-macaash, canshuur shaqo iyo canshuur eksaska ururada horumarineed ee dawladda deegaanka;

q) Dawladda Federaalka iyo tan deegaankuba waxay iyadoo sharciga la raacayo qaybsadaan:-

i) Macaashal-macaashka, canshuurta shaqada, canshuurta iibka iyo canshuurta eksaska ee ka soo baxa ururada horumarineed ee ay wadajir u sameeyaan;

ii) Macaashal-macaashka ganacsiga ee shirkaddaha, kan faa'iidada xubnaha shirkadaha iyo canshuurta iibka;

iii) Macaashal-macaashka dakhliga shaqooyinka waaweyn ee macdanta, dhammaan shaqooyinka batroolka, gaaska dabiiciga iyo kuwa laga bixiyo canshuurta rooyaalitiga (royalty);

k) Ha'yaddaha Dawladda deegaanku shatiyada iyo adeegyada ay bixiyaan ka faa'iidaysigooda canshuuraadka ka soo baxaya ayey go'aamisaa, uruurisaana.

l) Waxay go'aamisaa, uruurisaana canshuurta laga helo

isticmaalka dhirta;

m) Waxay ku dhawaaqi kartaa xaalad deg-deg ah markay timaado dhibaato dabiici ah ama cudur khatar galinaya caafimaadka bulshada.

## CUTUBKA SHANAAD
## GOLAHA XILDHIBAANADA

### Qod. 48aad
### Xubnaha Golaha Xildhibaannada

1. Xubnaha xildhibaanada deegaanka waxay dadweynuhu shan-tii sannaba hal mar ku soo doortaan nidaam codbixineed oo u dhaca toos, xaq, madaxbanaani, loona dhan yahay isla markaana qarsoodi ah.
2. Xubnaha xildhibaanada waxa lagu soo doortaa nidaam doorasho oo uu ku guulaysto tartamaha aqlabiyada ka hela tartamayaasha kale ee goob doorasho kasta.
3. Xubnaha xildhibaanadu waxay matalaan guud ahaan shacbiga deegaanka, waxayna u hoggaansamaan;

   b)Dastuurka;

   t)Shacabka; iyo

   j)Damiirkooda oo qudha.
4. Qof kasta oo xubin ka ah golaha laguma dacwayn karo codka ama ra'yiga golaha dhexdiisa uu ka dhiibto. Iyadoo arrintaas loo aanaynayana lagama qaadi karo tallaabooyin maamul.
5. Xubin kasta oo xildhibaan ah lama xidhi karo dacwana laguma oogi karo iyadoo aan Golaha Xildhibaanada laga helin oggolaansho haddii uusan fal danbiyeed culus faraha kula jirin.

6. Qof kastoo xildhibaan ah markii dadkii soo doortay kala noqdaan kalsoonidii si dastuurka waafaqsan wuxuu waayayaa xubinimadii wakiilnimo.

## Qod. 49^aad
## Awoodaha Golaha Xildhibaanada Deegaanka

1.Golaha xildhibaanada Deegaanku sida dastuurkani xeerinayo waa hay'adda sharci dejinta deegaanka.

2. Iyadoo aan lagu xadgudbaynin dastuurka dawladda dimoqraadiga federaalka ee Itoobiya waxaa awooda siyaasadeed ee sare ee arrimaha degaanka dhexdiisa iska leh golaha Xildhibaanada.

3. Iyadoo sideeda loo tixgelinayo awooda guud ee ku xusan farqada 1^aad iyo 2^aad ee qodobkan ayaa Golaha xildhibaanadu gaar ahaan uu leeyahay awoodaha hoos ku xusan:

   b) Isagoo raacaya Dastuurkan ayaa wuxuu soo saarayaa sharciyo kala duwan oo aan ka hor imanayn dastuurka iyo xeerarka kale ee Federaalka;

   t) Isagoo tixgelinaya tirada dadka, badka dhuleed ee degaanka iyo socodka dhaq-dhaqaaqa nolosha bulsho-dhaqaaleed ayuu dhisayaa qaab-dhismeedyo is-maamul ama maamul oo dheeri ah;

   j) Iyadoo tixgelin la siinayo awooda Dawladda Federaaliga, wuxuu ansixiyaa heshiisyada lala galo dawladaha kale ee deegaanada;

   x) Goluhu wuxuu dooranayaa Af-hayeenka iyo Af-hayeen ku xigeenka golaha Xildhibaanada; wuxuuna magacaabaa gudiyada joogtada iyo ku meelgaadhka ah ee loogu

baahan yahay hawlaha golaha;

kh) Wuxuu xubnaha golaha ka dhex doortaa madax-weynaha dawladda degaanka; marka madax-weyanaha degaaaanku soo dhaweeyana wuxuu ansixiyaa magacaabista golaha hawl-fulinta;

d) Wuxuu dhisayaa hay'adaha Hanti-dhawrka iyo dabagalka;

r) Si loo sugo nabad-gelyada iyo deganaanshaha deegaanka, wuxuu dhisaa xoogaga ciidanka booliska nabad-gelyada;

s) Wuxuu ansixinayaa siyaasadaha, istiraatijiyadda iyo qorshayaasha bulshada iyo dhaqaalaha deegaanka;

sh) Wuxuu soo saaraa sharciyada ilaha dhakhliga deegaanka, wuxuuna ansixiyaa miisaaniyada deegaanka;

dh) Wuxuu go'aamiyaa qaabka qaybinta miisaaniyada deegaanka;

c) Wuxuu dhisayaa habeeyaana hay'addo iyo mashaariic lagu horumarinayo laguna kobcinayo adeegga bulsho iyo horumarka dhaqaalaha;

g) Markuu horkeeno madax-weynaha deegaanku, wuxuu ansixiyaa magacaabida guddoomiyaha iyo guddoomiye-ku-xigeenka maxkamadda guud iyo hanti-dhawrka guud ee Deegaanka;

f) Wuxuu canshuur saaraa ilaha dakhliga deegaanka;

q) wuxuu soo saaraa xeerar la xidhiidha maamulka shaqaalaha iyo xaaladaha shaqo ee deegaanka;

k) Wuxuu soo saaraa xeer-nidaamyo deegaanka lagaga hirgelinayo Dastuurka iyo sharciyada kale ee Federaalka;

l) Wuxuu wax-waydiin ugu yeedhaa madax-weynaha iyo madaxda hay'adaha kale ee deegaanka; wuxuuna baadhaa waxaqabadka Golaha Hawl-fulinta deegaanka

## Qaddobka 50aad

## Xulashada iyo Muddada Shaqo ee Af-hayeenka iyo Af-hayeen-ku-Xigeenka Golaha Deegaanka

1. Golaha Xil-dhibaannada Deegaanku wuxuu yeelanayaa Af-hayeen iyo Af-hayeen-ku-Xigeen.
2. Sida ku xusan Qodobka 49(3) ee Dastuurka xisbiga kali ahaantii ama xisbiyada ka haysta aqlabiyada golaha Xil-dhibaanada Deegaanka ayaa xubnaha ka soo dhex magacaabaya Af-hayeenka iyo Af-hayeen-ku-xigeenka.Af-hayeenku wuxuu hoos-tagayaa Golaha Xildhibaannada Deegaanka.
3. Muddada Shaqo ee Af-hayeenku waa muddada shaqo ee Golaha Xildhibaannada Deegaanka.

## Qod.51aad

## Awoodaha iyo Waajibaadka Af-hayeenka

Af-hayeenka wuxuu leeyahay awoodaha iyo waajibaadka hoos ku xusan:–

1. Wuxuu isugu yeedhaa, hoggaamiyaana shirarka caadiga ah iyo kuwa deg-dega ah ee Golaha.
2 Golaha Xildhibaanaduu matalaa.
3- Xafiiska Golaha Xildhibaanada ayuu habeeyaa. Wuxuuna hoggaamiyaa hawlaha maamulka guud.
4 Wuxuu taabba-geliyaa tallaabooyinka anshax ee Goluhu go'aamiyo inuu ka qaado xubnahiisa.
5. Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee Golahu u wakiisho.

## Qod.52aad

## Awoodaha iyo Waajibaadka Af-hayeen-ku-xigeenka

Af-hayeen-ku-xigeenku wuxuu hoos-tagayaa Af-hayeenka iyo Golaha Xildhibaanada wuxuuna leeyahay Awoodaha iyo waajibaadkan:

1. Wuxuu qabtaa hawlaha Af-hayeenku u xilsaaro.
2. Wuxuu matalaa Af-hayeenka marka aanu joogin ama hawsha qaban karin.

## Qod.53aad

## Xafiiska Golaha Xildhibaanada

1. Golaha xildhibaanadu wuxuu yeelan xafiis u gaar ah.
2. Awoodaha iyo waajibaadka xafiiska sharci baa lagu go'aamin.

## Qod.54aad

## Shirarka iyo Muddada Shaqo ee Golaha

1. Golaha Xildhibaanadu kal-fadhigiisa caadiga ahi wuxuu qabsoomaa ugu yaraan sannadkii laba jeer.
2. Muddada shaqo ee xubnaha Golaha xildhibaanadu waa Shan sano. Bil ka hor dhammaadka muddada shaqo ee golaha xildhibaanada waxaa la qabanayaa, lana soo dhamaystirayaa doorasho cusub, isla markaana markay dhammaato bishii u hadhsanayd Golihii xildhibaanadii hore bil gudaheed ayey xildhibaanada la soo doortay shaqada ku bilaabayaan.
3. Shir deg-deg ah wuxuu qabsoomaa:
   b) Marka Af-hayeenku isugu yeedho, ama

t) Marka ay codsadaan in ka badan 1/3(sadeex-dalool meel) xubnaha Golaha

4 Shirarka Golaha Xildhabaanadu waxay u dhacaan si cad. Hase ahaatee, waxaa shir qarsoodi ah la qaban karaa haddii ay codsadaan xubnaha Golaha ama Golaha Hawl-fulinta cod-sigaana ay taageeraan kala badh in ka badan xubnaha Golaha.

## Qod.55aad

## Go'aanada iyo Xeer-nidaamiyeyaasha Golaha

1. Shirka Golaha xildhibaanadu wuxuu qabsoomaa markay xubnuhu saddex dalool laba (2/3) ay goob joog yihiin.
2. Haddii aan si gaar ah dastuurkan loogu xeerin, dhammaan go'aannada goluhu waxay ku hirgalayaan cod hal dheeri ah.
3. Goluhu wuxuu xeer nidaamiyeyaal ka soo saarayaa qaabka uu u shaqeeyo iyo habka uu u dejiyo sharciga.

## Qod.56aad

## Aas-aasida Golaha Guurtida iyo Madax-dhaqameedyada

Waxaa Dastuurkan lagu asaasay Golaha Guurtida iyo Madax-dhaqameedyada. Awoodahooda iyo waajibaadkooda iyo waliba xidhiidhka ay la yeelan karaan hay'adaha kale ee dawladda waxaa lagu xeerin doonaa sharci gaar ah.

## CUTUBKA LIXAAD

## QAYBTA SHARCI- FULINTA

### Qod.57[aad]

### Awoodaha Golaha Hawl-fulinta.

1- Awoodda ugu saraysa ee fulinta dawladda degaanka waxa iska leh Madaxweynaha iyo Golaha Hawl-fulinta Deegaanka.

2- Madaxweynaha iyo Golaha Hawl-fulinta Deegaanku waxay hoos-tagayaan Golaha Xildhibaanada Deegaanka.

3- Xubnaha Golaha Hawl-fulintu, go'aanada dawladeed ee ay wadajir u gaadhaan iyo hawlaha ay qabtaan waxaa ka saaran xil wada jir ah.

### Qod.58[aad]

### Xubnaha Golaha Hawl-fulinta Deegaanka

1- Golaha Hawl-fulinta deegaanku waa hay'ad ka kooban madax-weynaha, madaxweyne-ku-xigeenka, madaxda xafiisyada fulinta iyo xubnaha kale ee sharcigu xeeriyo.

2 Madaxweynahu waa Guddoomiyaha Golaha Hawl-fulinta degaanka.

3. Golaha Hawl-fulinta degaanku wuxuu hoos-tagayaa madax-weynaha iyo Golaha Xil-dhibaannada.

4. Go,aannada uu gaadho Golaha Hawl-fulinta deegaanka waxaa kula xisaabtama Golaha Xil-dhibaannada.

## Qod, 59aad

## AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA-HAWL-FULINTA DEEGAANKA

Iyadoo Dastuurka Federaalka sidiisa loo tix-gelinayo, golaha Hawl-fulinta Deegaanku wuuxuu leeyahay awoodaha iyo waajibaadkan hoos ku xusan:-

1. wuxuu hubiyaa, xaqiijiyaana inay deegaanka ka dhaqan-galeen sharciyada iyo go'aannada ka soo baxa dawladda federaalka iyo Golaha Xildhibaannada Degaanka;
2. Wuxuu dhisaa hay'adaha qaybaha fulinta iyo hay'adaha kale ee maamulka degaanka. Marka uu Golaha Xil-dhibaanadu ogolaadana wuu dhaqan-geliyaa, shaqadoodana wuu daba galaa wuuna hoggaamiyaa;
3. Wuxuu diyaariyaa miisaaniyad sannadeedka degaanka; wuxuuna hordhigaa Golaha Xil-dhibaannada, marka la an-sixiyana wuu hirgalayaa;
4. Iyadoo sideeda loo tixgalinayo Qod. 49(3)(t) ee Dastuurkan; wuxuu soo diyaariyaa Golaha Xil-dhibaannadana hordhigaa qaab-dhismeedka heerarka kala duwan ee maamul ee de-gaanka ka jira, marka la ansixiyana hirgeliyaa;
5. Wuxuu dejiyaa istiritaajiyadda, iyo siyaasadaha horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada deegaanka, wuxuu sharciyada qabyada ah hordhigaa Golaha Xil-dhibaannada Deegaanka marka ay ansixiyaanna hirgeliyaa;
6. Wuxuu xaqiijiyaa xurmaynta haybadda sharciyada iyo nidaamka;

7. Isagoo ka duulaya awoodda Golaha Xil-dhibaannadu siiyo wuxuu soo saaraa Xeer-nidaamiyeyaal;
8. Wuxuu shaqada ka joojiyaa xubnaha Golaha Hawl-fulinta marka ay xilkooda gudan waayaan;
9. Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee Golaha Xil-dhibaannada iyo madaxweynuhu u xilsaaraan.

## Qod.60[aad]

## Magacaabidda iyo Mudada Shaqo ee Madaxweynaha

1. Madaxweynaha waxaa magacaaba Golaha Xil-dhibaannada marka ay soo jeediyaan xisbiga ama xisbiyada aqlabiyadda ku leh Golaha xil-dhiibannada.
2. Sida ku xusan Dastuurkan, haddii aan si kale loo goaamin; muddada shaqo ee madax-weynuhu waa muddada shaqo ee Golaha Xil-dhibaannada Deegaanka.

## Qod.61[aad]

## Awoodaha iyo Waajibaadka Madaxweyanaha

1. Madaxweyanaha Deegaanku waa madaxa maamulka deegaanka; Guddoomiyaha Golaha Hawl-fulinta.
2. Madax-weynaha Deegaanku wuxuu hoos-tagayaa Golaha Xil-dhibannada Deegaanka.
3. Iyadoo sideeda loo tix-gelinayo farqada laad ee Qodobkan, Madaxweynahu:

   b) Wuxuu hoggaamiyaa, isku dubarridaa, matalaana Golaha Hawlfulinta Deegaaka;

t) Wuxuu dabagalaa hir-gelinta siyaasadda, goaannada, iyo awaamiirta ay soo saaraan Golaha Hawl-fulinta;

j) Wuxuu soo xulaa magacaabistoodana ka ansixiyaa Golaha Xil- dhibaannada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-ku-xigeenka Maxkamadda Guud, Hanti dhawrka Guud iyo Xubnaha Golaha Hawl-fulinta;

x) Iyadoo aan lagu xadgubaynin tirsiga 3aad xubinta (j) ee Qodobkan, marka uusan Gulaha Xil-dhibaannadu shir-sanayn, ayaa wuxuu si ku meelgaadh ah u meeleeyaa xubnaha Golaha Hawl-fulinta marka laga reebo Madax-weyne-ku-xigeenka; isla markaana hawl-geliyaa ilaa shirka Golaha Xil-dhibaannada ee xiga;

kh) Marka laga reebo Xubnaha lagu caddeeyay farqada 3aad xabinta (j) wuxuu magacaabistooda Golaha Hawl-fulinta hor-dhigaa kana ansixiyaa madaxda xafiisyada iyo hay'adaha sare ee dhaqaalaha, bulshada iyo maamulka degaanka;

d) Wuxuu dusha ka maamulaa, kana hoggaamiyaa xoogagga nabad-gelyada iyo booliska si loo sugo ammaanka loona xushmeeyo sharciga iyo nidaamka deegaanka;

r) Wuxuu hoggaamiyaa, daba-galaana jaranjarooyinka maamulka hoose ee deegaanka ka jira,

s) Wuxuu Golaha Xil-dhibaannada siiyaa warbixin tafatiran oo ku saabsan xaaladda degaanka, waxqabadka Golaha Hawl-fulinta iyo qorshaha mustaqbalka ee deegaanka marka Goluhu shir isugu yimaado;

sh) Si sharciga waafaqsan ayuu cafis iyo saamaxaad ku fidiyaa;

dh) wuxuu xushmeeyaa, ilaaliyaana Dastuurka Federaalka iyo

kan deegaankaba;

c) Wuxuu fuliyaa hawlaha kale ee ay Golaha xil-dhibaannadu u xillsaaraan.

### Qod.62aad

### Awoodaha iyo Waajibaadka Madax weyne-ku-xigaanka

Iyadoo madaxweynaha deegaanku soo-xulo madax-weyne-ku-xigeenka kana ansixiyo Golaha Xil-dhibaannada Degaanka ayaa wuxuu leeyahay awoodahan iyo waajibaadkan:

1. Wuxuu qabtaa hawlaha ay madaxweynaha iyo Golaha Hawl-fulinta Deegaanku u xilsaaraan.
2. Wuxuu matalaa marka madax-weynuhu maqan yahay.

### Qod.63aad

### Xafiiska Madaxweynaha

1. Madaxweynaha deegaanku si uu u guto awoodaha iyo waajibaadka lagu siiyay dastuurka wuxuu yeelanayaa xafiis u gaar ah.
2. Xafiiska madaxweynuhu wuxuu kaloo noqonayaa xafiiska Golaha Hawl-fulinta.
3. Xafiiska waxaa hoggaamiya xoghaye uu madax-weynuhu magacaabo.
4. Iyadoo Xoghayuhu uu hoos-tagayo madaxweynaha;

b)Wuxuu xafiiska u sameeyaa xoog shaqaale, iyo qalabka uu u baahan yahay;

t) Dukumentiyada dawladda ayuu si habboon u hayaa una ilaaliyaa;

j) Wuxuu xaqiijiyaa in hadal qoraalka si hufan loo qaado;

x) Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee madax-weynuhu u xulsaaro.

### Qod.64aad

### Dhisidda hay'adaha Dhaqaale, Bulsho iyo Maamul

Waxaa hadba sida loogu baahdo loo dhisayaa xafiisyo, komishineero iyo hay'ado kale oo qabta, iskuna dubarida hawlaha dhaqaale, bulsho iyo maamul ee deegaanka. Hirgalinteedana xeer ayaa lagu faah-faahinayaa.

## CUTUBKA TODOBAAD

## QAAB–DHISMEEDKA MAXKAMADAHA IYO AWOODDA GARSOOR

### Qod.65 aad.

### DHisidda Garsoor Madax bannaan

1- Dastuurkan waxaa lagu aasaasay hay'ado Garsoor deegaan oo madax bannaan.

2- Lama asaasayo maxkamad gaar ah ama ku meel-gaadh ah, oo ka baxsan maxkamadaha caadiga ah ama kuwa awood Garsoor sharcigu siiyey.

### Qod.66 aad.

### *Garsoor dhaqameedka iyo ka Diiniga ah*

1- `Dastuurkan Qod.34aad farqadiisa 5aad, sida ku cad Garsoor dhaqameedka iyo ka Diiniga ah waa la dhisi karaa ama la aqoonsan karaa.

2- Inta aan Dastuurkan la ansixin ka hor Garsoor dhaqameedka iyo kuwa Diiniga ah ee aqoonsi dawladeed ku sii shaqaynayay waxa aqoonsi lagu siinayaa laguna dhisayaa Dastuurkan.

## Qod.67aad.

## *Awoodda Garsoor*

1- Awoodda Garsoorka ee deegaanka waxa iska leh Maxkamad-daha oo qudha.

2- Hay'addaha Garsoorka heer kasta oo ay yihiin way ka madax-bannaanyihiin faragelin ama caddadis kaga iman kara hay'adaha ama mas'uul dawladeed, waxa kale oo ay ka madax-bannaanyihiin wixii kaloo fara gelin ah.

3- Garsooreyaashu waxay hawlahooda u gudanayaan si madax-banaani ku dheehan tahay, sharciga mooyee wax kalena uma hoggaansamayaan.

4- Garsoore kasta marka laga reebo xaaladaha hoos ku xusan, isagoo aan gaadhin da'da hawl-gabnimada ama aanu raali ka ahayn lagama qaadi karo shaqada Garsoornimada.

   b) Marka guddiga Garsoorku ay go'aamiyaan, si waafaqsan xeerka anshaxa garsoorayaasha in Garsoorahu khalad galay ama ku sifoobo karti la'aan iyo jileec; ama,

   t) Marka sababo caafimaad awgood la go'aamiyo inuuna garsooruhu hawsha si hufan u gudan karin; oo

   j) Golaha Xildhibaanadu ku ansixiyaan cod hal dheeri ah go'aanka guddiga garsoorka .

5) Sida ku xusan Qodobkan farqadiisa (4aad), marka Guddigu isla qaato in Garsooruhu gaystay khalad shaqada lagaga qaadi karo, waxaa laga joojinayaa hawsha Garsoornimo ilaa inta Golaha Xildhibaanadu go'aaminayo.

6) Garsoorana wakhtiga hawlgabnimada ee sharigu xeeriyey looma dheerayn karo.

## Qod.68aad.

## *Qaab-dhismeedka iyo Awoodaha Maxkamadaha*

1- Qaab-dhismeedka hay'addaha Garsoor ee deegaanku waxay ka koobnaanayaan Maxkamadda guud, maxkamadaha sare ee gobolada iyo Maxkamadaha degmooyinka.

2. Maxkamadda guud ee deegaanku waxay yeelanaysaa awoodahan hoos ku xusan;

   b) Maxkamadda guud ee degaanku waxay arrimaha heer deegaan ku yeelanaysaa awoodda Garsoor ee u saraysa kama dambaystana ah;

   t) Awoodda garsoorka Maxkamadda sare ee Federaalka;

   j) Awoodda garsoorka dib-u-eegid ee go'aamada kama dambaysta ah ee ay bixiyaan Maxkamaddaha degaanku ee leh khaladaad sharci oo asaasi ah. Faah-faahinta arrintan sharci ayaa lagu qeexi doonaa.

3- Awooda Garsoor ee Maxkamadaha sare ee degaanku leeyihiin waxaa u dheer awooda Garsooridda Maxkamadaha Federaalka ee Heerka bilawga.

4- Go'aanada ay gaadhaan Maxkamadaha sare ee degaanku, iyagoo adeegsanaya awoodda Garsoor ee Maxkamadda Heerka Bilawga ah ee Federaalka, waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Guud ee Deegaanka;

5 Rafcaanka laga qaato Maxkamadda Guud ee degaanka, iyadoo adeegsanaysa awooda Garsoor ee Federaal waxaa eega Maxkamadda Guud ee Federaalka.

6-Maxkamadaha degmooyinka ee degaanku waa awoodda garsoor ee hoose ee heerka bilawga.

7-Maxkamadda Guud ee degaanku waxay Golaha Xildhibaannada Deegaanka hordhigtaa, kana ansixisaa miisaaiyada maamulka garsoorka marka loo fasaxana maamushaa.

8-Maxkamaddaha Guud iyo kuwa sare ee degaanku hawlaha garsoor ee ay qabtaan iyagoo matalaya maxkamadaha Federaalka waxaa miisaaniyad kabis ah ka siinaya dawladda Federaalka.

Qod.69aad

*Magacaabida Garsooreyaasha*

1- Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-ku-xigeenka Maxkamadda Guud waxaa soo jeediya Madaxweynaha deegaanka, magacaabistoodana ka ansixinaya Golaha Xildhibaanada.

2- Garsooreyaasha Maxkamadda guud, maxkamadaha sare iyo kuwa degmoyinka waxaa soo jeediya Guddiga Garsoorka magacaabistoodana ka ansixiya Golaha Xildhibaannada.

3- Guddigu intaanu xulashada Garsooreyaasha u gudbinin golaha xildhibaanada waxaa xil ka saaran yahay isbar-bar-dhiga iyo hubsashada ra'yiga uu musharaxiinta ka qabo Guddiga Garsoorka ee Federaalku. Haddii saddex bilood gudahood Guddiga Garsoorka Federaalku ku soo gudbin waayaan ra'yigooda waxaa toos u ansixinaya golaha xil-dhibaanaada.

Qod. 70aad

*Dhisida Guddiga Maamulka Garsoorka Deegaanka*

1- Waxaa la dhisayaa Guddi Maamul garsoor oo Garsooreyaashu aqlabiyada leeyihiin.
2- Guddoomiyaha Maxkamadda guud wuxuu noqonayaa Guddoomiyaha guddiga.
3- Awoodda iyo waajibaadka Guddiga iyo waliba xubnahoodaba waxaa lagu xeerin doonaa sharci gaar ah.

Qod. 71aad

*Fasiraadda Dastuurka*

1- Haddii uu yimaaddo muran dastuuri ah waxaa go'aan ka gaadha Komishinka Fasiraadda Dastuurka oo ka kooban min hal xubin oo laga soo magacaabo Goleyaasha Xil-dhibaannada Degmooyinka.
2- Komishinka Fasiraadda Dastuurka waa inuu go'aan kama danbays ah ku gaadhaa lixdan (60) maalmood gudahood marka Guddiga Baadhista Dastuurku u soo gudbiyo ra'yi go'aameed.
3- Muddada shaqo ee komishinku waxay ahaanaysaa shan sano.
4- Komishinku wuxuu dooranayaa shir-guddoomiye iyo xoghaye. Qalabka qoraalka iyo kaalmada lacageed ee ay shaqadooda ugu baahan yihiin waxay ka helayaan Golaha Xil-dhibaannada Deegaanka.

## Qod. 72aad

## *Guddiga Baadhista Arrimaha Dastuurka*

1- Dastuurkan waxaa lagu asaasay Guddiga Baadhista Arrimaha Dastuurka.Deegaanka.

2- Guddiga Baadhista Dastuurka degaanku wuxuu ka kooban yahay kow iyo toban (11) xubnood, waxayna kala yihiin sidan hoos ku xusan:-

b) Guddomiyaha Maxkamadda guud = Guddoomiye

t) Guddoomiye-ku-xigeenka Maxkamadda Guud = ku xigeen.

j) Lix sharci yaqaan oo aqoontooda sharci iyo asluubtooda lagu soo doortay oo uu soo xulay Madax-weynaha Degaanku, Golaha xildhibaanada deegaankuna ansixiyay = Xubno

x) Saddex xildhibaan oo uu soo xulay Af-hayeenku, Golaha xildhibaanaduna ansixinayaan = Xubno.

## Qod. 73aad

## *Awooda iyo Waajibaadka Guddiga Baadhista*

1- Guddiga baadhista Dastuurku waxay leeyihiin awoodda baadhista muran dastuuri ah. Marka ay baadhaan, haddii ay u arkaan in fasiraadda Dastuurku lagama maarmaan tahay, waxay taladooda u gudbinayaan Komishanka Fasiraadda Dastuurka.

2- Guddigu, kadib marka ay baadhaan cabashooyinka ay u soo gudbiyaan cidda ay arrintu taabanayso ama maxkamadda ay khusayso ee ku wajahan in shuruucda, xeer-nidaamyada iyo awaamiirta kala gedisan ee dawladda degaanku soo saarto, ay

ka hor imanayaan Dastuurka, waxay tala-bixintooda u gudbinayaan Komishanka Fasiraadda Dastuurka.

3- Markey maxkamaddaha ka timaado su'aal ku saabsan fasiraada Dastuurka:-

b) Guddigu wuxuu arrinta dastuurka dib ugu celinayaa maxkamadda ay khusayso, hadduu u arko inaan loo baahnayn fasiraadda dastuurka. Haseyeeshee, ciddii aan ku qanacsanayn go'aanka Guddiga waxay cabashadooda qoraal ugu gudbin kartaa Komishinka.

t) Hadduu guddigu u arko in fasiraad Dastuur baahi loo qabo waxay ra'yi go'aameed u gudbinayaan komishinka. Go'aanka komishinkuna wuxuu noqonayaa kama dambays.

## CUTUBKA SIDDEEDAAD
## AWOODDA IYO DHISMAHA DEGMADA

### Qod. 74aad
*Qaab-dhismeedka*

Degmadu waxay yeelanaysa hay'addaha hoos ku cad;

1- Golaha degmada
2- Golaha hawl-fulinta degmada
3- Hay'adda garsoorka ee heerka koowaad.

### Qod. 75aad
*Golaha Xil-dhibaanada degmada.*

1- Golaha degmadu waa hay'ad laga hoos dhisayo golaha deegaanka.
2- Golaha degmada;

b) Waxa dhisaya wakiilo shacab oo matalaya tuulooyinka ay degmadu ka kooban tahay.

t) Wuxuu yeelanayaa Af-hayeen iyo Af-hayeen ku xigeen lagu magacaabayo soo dhawaynta ururka áma ururada siyaasadeed ee helay codka badan.

j) Kolba sida ay lagama maarmaan u tahay waxay dhisanaysaa guddiyo ku meel-gaadh ah iyo joogto ah.

Qod. 76aad

*Doorashada iyo la xisaabtanka Xubnaha Golaha Xildhibaanada Degmada.*

1- Xubnaha Golaha degmada shacabka ayaa si toos ah uga dhex dooranaya dadweynaha degan tuulooyinka ka jira degmada.

2- Xubnaha Golaha degmadu waxay hoos-tagayaan bulshada ama shacabka soo doortay.

Qod. 77aad

*Awooda iyo Waajibaadka Golaha Degmada.*

1. Galaha Degmadu wuxuu leeyahay awoodda sar ee degmda.
2. Iyadoo sideeda ay tahay sida ku xusan farqada 1aad ee qodobkan, Goluhu wuxuu yeelanayaa awooda iyo wajibaadka soo socda;

b) Wuxuu inta uu baadho ansixinayaa barnaamijyada iyo qorsheyaasha hawleed ee qabyada ah ee horumarinta dhaqaalaha, adeegyada bulshada iyo maamulka ee degmada.

t) Wuxuu dabagalayaa in wakhtigii loogu talo-galay lagu qabtay horumarinta aasaaska ee khayraadka xoolaha iyo

horumarinta daaqa, guud ahaana hawlaha horumarinta beeraha. Isla markaana iyadoo tixgelin gaar ah la siinayo loo hirgeliyey hawsha daryeelka iyo ilaalada horumarinta khayraadka dabiiciga ah.

j) Wuxuu abuurayaa xaalad ku habboon in ay shacabka deegaanku si balaadhan ugu baraarugaan, uguna dhaq-dhaqaaqaan hawlaha horumarka, gaar ahaana wuxuu habaynayaa sidii xoolo dhaqatada loogu soo dabbaali lahaa xaalad xasilooni iyo degganaansho ku dheehan tahay adeegga biyaha iyo daaqa kaga helaan goobaha ugu dhow.

x) Golaha degmadu si uu u xaqiijiyo lahaanshaha awooda siyaasadeed ee shacabka wuxuu si toos ah ama si dadban shacabka uga qayb-gelinayaa geedi-socodka soo saarista, fulinta iyo qiimaynta qorshaha.

kh) Wuxuu xubnaha ka dhex dooranayaa af-hayeen iyo af-hayeen ku xigeen. Wuxuuna magacaabayaa Guddomiye.

d) Wuxuu ansixinayaa magacaabista ku xigeenka gud-doomiyaha iyo mas'uuliyiinta kale ee uu u soo gudbiyo Guddoomiyahu.

r) Wuxuu soo saarayaa xeer-hoosaad lagu go'aaminayo nidaamka shaqo ee isaga u gaar ah.

s) Wuxuu xaqiijinayaa in sida sharciga lagu xusay loo ururiyey canshuurta isticmaalka dhulka, canshuurta dakhliga hawlaha beeraha iyo canshuuraha iyo lacagaha kale ee adeegga.

sh) Wuxuu sida ku habboon u isticmaalayaa ilaha dakhiliga degmada ee ka baxsan miisaaniyada deegaanku u qoon-deeyo, miisaaniyadana inta uu baadho ayuu ansixinayaa. Miisaaniyadda guud ee deegaanku u qoondeeyo isagoo ku

salaynaya sida ay u kala horeeyaan baahida degmadu ayuu u qoondaynayaa isticmaalkeedana dabagalayaa, kana warhaynayaa.

dh) Isagoo hay'addaha ku habboon ee dawladda deegaanka ka codsanaya aragtidooda ayuu magacaabayaa mas'uuliyiinta ama madaxda kale ee ka baxsan maamulka degmada.

c) Wuxuu dhaqan-gelinayaa awaamiir wax ka taraysa in la xaqiijiyo nabad-gelyada iyo xasiloonida degmada.

## Qod. 78aad
## Af-hayeenka Golaha Xildhibaanada Degmada.

1. Af-hayeenku wuxuu hoos tagayaa Golaha Degmada, wuxuuna xil ka saaran yahay inta uu wakhtigeeda sugo in uu shir ugu yeedho Golaha, isla markaana hoggaamiyo.
2. Awoodaha iyo waajibaadka kale ee faahfaahsan ee Af-hayeenka kolba sida ay ku habboon tahay waxa loo adeegsanayaa kuwa ku xusan dastuurkan ee la xidhiidha Af-hayeenka Golaha deegaanka.

## Qod. 79aad
## Ku xigeenka Af-hayeenka Golaha Xildhibaanada Degmda

1. Af-hayeen ku xigeenku wuxuu qabanayaa hawlaha si gaar ah ugu xil-saaraan Af-hayeenka iyo Golaha degmadu.
2. Wuxuu marka aanu joogin matelayaa, hawshiisana qabanayaa Af-hayeenka.
3. Wuxuu hoos tagayaa af-hayeenka degmada iyo Golaha Degmada.

## Qod. 80aad

## Shirka iyo Muddada Shaqo ee Golaha Xildhibaanada Degmada.

1. Golaha degmadu saddexdii biloodba hal mar ayuu shirayaa.
2. Marka shirka ay yimaadaan in ka badan 2/3 xubnaha Golaha shirku wuu furmayaa. Go'aanka waxaa lagu gaadhayaa cod hal dheeri ah.
3. Muddada shaqo ee Golaha xildhibaanada degmadu wuxuu noqonayaa shan sanno. Bil ka hor inta aanay dhamaanin muddada shaqo ee Goluhu waxa la qabanayaa, la soona gabagabaynayaa doorasho. Marka ay dhammaato muddada shaqo ee golihii hore wakhti bil gudaheed ah ayuu hawshiisa ku bilaabayaa golaha cusub.
4. Shirarka Golaha xildhibaanada Degmada si cad ayaa loo wadayaa, goluhu wakhtiga aanu ku jirin shirkiisa caadiga ah afhayeenku wuxuu isugu yeedhi karaa shir deg-deg ah. Haddii in ka badan qayb xubnaha Goluhu codsadaan in la qabto shir deg-deg ah, Af-hayeenka waxa waajib ku ah in uu isugu yeedhoo Golaha shir deg deg ah.

## Qod. 81aad

## Xafiiska Golaha Xildhibaanada Degmada.

Golaha degmadu wuxuu yeelan karaa xafiis.

## Qod. 82aad

## Golaha Hawl-fulinta Degmada.

1. Golaha hawl-fulinta degmadu waa hay'ad ay ku jiraan Guddoomiyaha, Gudoomiye- ku xigeenka Degmada iyo

weliba madaxda qaybaha xafiisyadda waaweyn ee fulinta ee kadhisan Degmada.

2. Hay'adda sharci fulinta ee degmadu waa Golaha hawlfulinta Degmada. Wayayna hoos tagaysag Guddoomiyaha iyo Golaha Degmada.

3. Xubnaha Golaha hawl-fulinta degmadu hawlaha ay ku sameeyaan awoodooda dawladeed iyo go'aanka ay gaadhaan si wada jir ah ayey mas'uuliyadi uga saaran tahay.

### Qod. 83aad

### Awooda iyo Waajibaadka Golaha Hawl-fulinta Degmada.

Golaha maamulka degmadu wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo Waajibaadka soo socda;

b) Wuxuu Degmada ka dhaqan-gelinayaa siyaasadaha, shuruucda, awaamiirta, qorsheyaasha iyo barnaamijyada dawladda federaalka iyo deegaanka.

t) Wuxuu isku duwayaa hay'addaha fulinta ee Degmada ka jira, hawshoodana dabagalaa, hoggaaminayaana.

j) Wuxuu diyaarinayaa miisaaniyad sannadeedka Degmada, una gudbinayaa Golaha Degmada marka la ansixiyana hirgelinayaa.

x) Wuxuu sida sharciga ku cad ururinayaa lacagta istic-maalka dhulka miyiga, canshuurta dakhliga hawlaha beer-falida iyo dakhliyada kale. Wuxuu daraasad ku samaynayaa xaalada lagu heli karo dakhliyo dheeraad ah

si go'aan looga gaadhana u gudbinayaa Golaha Degmada.

kh) Wuxuu ilaalinayaa nabad-gelyada iyo xasiloonida degmada, wuxuuna hoggaaminayaa hawshoodana xidhiidhinayaa hay'addaha booliska iyo nabad-gelyada ee degmada.

d) Wuxuu si baláadhan shacabka ugu baraarujinayaa hawlaha horumarka. Wuxuu dedejinayaa horumarka Miyiga, wuxuu ilaalinayaa, daryeelayaa, horumarinayaana khayraadka dabiiciga ah.

r) Inta uu diyaariyo qorsheyaasha dhaqaale, bulsho iyo maamul ayuu si loo ansixiyo u gudbinayaa Golaha Degmada. Marka la oggolaadana wuu hirgelinayaa.

s) Wuxuu isagoo wakhtigeeda la sugaya qabanayaa hawlaha horumarinta khayraadka xoolaha ee aasaasiga, horumarinta daaqa, guud ahaana hawlaha horumarinta beeraha ee Degmada. Wuxuu tixgelin gaar ah siinayaa oo uu qabanayaa hawlaha ilaalada iyo daryeelka horumarka khayraadka dabiiciga ah.

sh) Wuxuu si joogto ah u dabagalayaa in daryeelka iyo ilaalada ay mudan yihiin loo fidiyey farshaxanka laga helo Degmada.

dh) Waxaa kale oo uu qabanayaa hawlaha kale ee looga xilsaaro Golaha Degmada iyo Golaha maamulka deegaanka.

## Qod. 84aad

## Magacaabista iyo Muddada Shaqo ee Guddoomiyaha Degmada

1. Guddoomiyaha Degmada waxa magacaabaya Golaha Degmada marka uu u soo dhaweeyo ururka/ururada siyaasadeed ee

Golaha Degmada ku guulaysta ama codka badan hela.

2. Haddii aan si ka duwan loo dhigin muddada shaqo ee Guddoomiyaha degmadu waxay noqonaysaa muddada shaqo ee Golaha Degmada.

fooqaga 3

### Qod. 85aad

### Awooda iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Degmada.

1. Guddoomiyaha degmadu wuxuu hoos tagayaa Golaha xil-dhibaanada Degmada iyo Madaxweynaha Deegaanka, wuxuuna yahay hoggaamiyaha hawlaha maamulka ee Degmada.
2. Iyadoo sideeda ay tahay sida ku xusan farqada 1aad ee qodobkani, Guddoomiyuhu:
   - b) Wuxuu matelayaa, shirinayaa, hoggaaminayaana Golaha hawl-fulinta ee Degmada.
   - t) Wuxuu xaqiijinayaa in Degmada laga dhaqan-geliyey siyaasadaha, shuruucda, awaamiirta iyo barnaamijyada dawladda federaalka iyo deegaanka,
   - j) Wuxuu si guud isugu dubaridayaa, u hoggaaminayaa, una dabagalayaa hawlaha xubnaha Golaha hawl-fulinta Degmada, hay'addaha kala gedisan iyo tuulooyinka ka midka ah.
   - x) Wuxuu ka warhaynayaa, dhaqan-galkeedana dabagalayaa in wakhtiga loogu talo-galay lagu diyaariyey adeegyada bulshada, barnaamijyada horumarinta dhaqaalaha iyo qorsheyaasha Degmada.
   - kh) wuxuu Golaha Degmada u dhawaynayaa, kana an-sixinayaa magacaabista xubnaha Golaha hawl-fulinta Degmada oo uu ku jiro Guddoomiye ku xigeenku.

d) Wuxuu dusha ka hoggaaminayaa, kana warhayaa xoogagga nabadgelyada iyo Booliska maleeshiyada ee loo dhisay in ay suggaan sharciga iyo nidaamka amaanka degmada.

r) Waxaa kale oo uu qabanayaa hawlaha kale ee looga xilsaaro Golaha fulinta Degmada iyo Madaxweynaha deegaanka.

Qod. 86aad

Magacaabista,Awoodda iyo Waajibaadka Gudoomiye ku xigeenka degmada.

Marka uu soo dhaweeyo Guddoomiyaha degmadu waxa magacaabistiisa ansixinaya Golaha Degmada. Wuxuuna Yeelanayaa awoodda iyo waajibaadka soo socda.

1. Wuxuu qabanayaa hawlaha ay si gaar ah ugu xilsaaraan Guddoomiyaha iyo Golaha hawl-fulinta Degmada.
2. Marka aanu Guddoomiyuhu joogin ama aanu hawsha qaban karaynin ayuu isagoo matalaya hawsha qabanayaa.
3. Guddoomiye ku xigeenka degmadu waxuu hoos tagayaa Guddoomiyaha Degmada iyo Golaha hawl-fulinta Degmada.

Qod. 87aad

Xafiiska Maamulka Degmada

1) Xafiiska Golaha hawl-fulinta Degmada waxa hoggaaminaya mas'uul hawshaas u qaabilsan oo uu magacaabay Guddoomiyuhu.
2) Qodobada la xidhiidha awoodda iyo waajibaadyada xafiiska Madaxweynaha deegaanka ee dastuurkan ku xusan, kolba sida ay ugu habboon yihiin ayaa loogu adeegsanayaa xafiiska Golaha hawl-fulinta Degmada.

### Qod. 88aad

### Dhismaha Goleyaasha Magaalada.

1. Magaalooyinka ka jira deegaanku waxay yeelanayaan Gole magaalo oo ku salaysan heerka korida horumarkooda.
2. Awoodda iyo Waajibaadka Golaha magaalada iyo weliba xidhiidhka ay la leeyihiin hayadaha kale ee dawladda waxa lagu soo saari doonaa sharci faah-faahsan.

## CUTUBKA SAGAALAAD

## AWOODDA IYO QAAB–DHISMEEDKA TUULADA.

### Qod. 89aad

### Qaab-dhismeedka iyo Awoodda Tuulada.

1. Tuulada waxa loo dhisayaa si joogto ah iyo si guurtaba. Bulshada guurta goobta ay joogaan waxa loo dhisayaa qaab tixgelinaya xaaladaha nololeed ee bulshada oo ku salaysan daraasad. Faahfaahinteedana sharci ayaa lagu soo saarayaa.
2. Maamulka xaafadu waa qaybta maamulka dawladeed ee u hoosaysa sida uu dhigeyo dastuurkani, wuxuuna hoos-tagayaa kolba xaaladu sida ay tahay, magaalada ama maamulka degmada uu ka tirsan yahay. Faahfaahinta sharci ayaa lagu soo saarayaa.
3. Xaafadu waxay yeelanaysaa hay'adaha hoos ku cad.
   b) Golaha tuulada;
   f) Golaha maamulka tuulada, iyo
   j) Maxakamadda bulshada.

## Qod. 90aad

## Golaha Xildhibaanada Tuulada

1. Golaha tuuladu waa hay'adda awooda sare ee shacabka tuulada deggan.
2. Xubnaha Golaha tuulada waxa toos u soo dooranaya dadweynaha tuulada.
3. Xubnaha Goluhu waxay hoos tagayaan shacabkii soo doortay.
4. Golaha xaafadu wuxuu hoostagaa kolba xaaladu siday tahay Golaha magaalada ama Golaha Degmada ee uu ku hoos jiro.

## Qod. 91aad

## Awooda iyo Waajibaadka Golaha Tuulada.

Golaha tuuladu wuxuu yeelanayaa awoodda iyo waajibaadka hoos ku xusan;

1. Wuxuu xaqiijinayaa in la dhaqan-geliyey qorsheyaasha iyo awaamiirta uu soo saaro Golaha degmadu.
2. Wuxuu xubnaha Golaha tuulada doorasho kaga dhex magacaabayaa Af-hayeenka, Af-hayeen ku xigeenka, Guddoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeenka xaafadda. Wuxuuna dhisayaa Golaha maamulka Xaafadda.
3. Wuxuu ansixinayaa magacaabista Guddoomiye ku xigeenka, golaha hawl-fulinta iyo gorsoorayaasha Maxkamadaha bulshada xaafadda ee uu soo dhaweeyo Guddoomiyaha xaafaddu.
4. Wuxuu xaqiijinayaa in sharciga iyo nidaamka laga sugay xaafadda.
5. Wuxuu dabagalayaa hawlaha daryeelka iyo horumarinta khayraadka dabiiciga ah.

Qod. 92aad

**Af-hayeenka iyo Af-hayeen ku xigeenka Golaha Xil-dhibaanada Tuulada**

Golaha tuulada waxa hoggaaminaya Af-hayeen iyo af-hayeen ku xigeen laga dhex dooranayo xubnaha. Faah-faahintana sharci ayaa lagu soo saarayaa.

Qod. 93aad

Qaab-dhismeedka Golaha Hawl-fulinta Tuulada.

1. Golaha hawl-fulintu waa hay'adda fulinta ee hoose oo ka kooban Guddoomiyaha, Gudoomiye ku xigeenka Degmada iyo xubnaha kale ee sharciga lagu go'aaminayo.
2. Golaha fulinta xaafadu wuxuu hoostagayaa Golaha tuulada iyo Golaha maamulka Degmada ama sida ay lagama maarmaan u tahay maamulka magaalada.

Qod. 94aad

Awoodda iyo Waajibaadka Golaha Hawl-fulinta Tuulada.

Golaha hawl-fulinta tuuladu wuxuu yeelanayaa awoodda iyi waajibaadka hoos ku cad:

b) Wuxuu diyaarinayaa barnaamijyadda iyo qorsheyaasha horumarinta, una gudbinayaa Golaha tuulada, kana ansixinayaa, dhaqan-gelinayaana.

t) Wuxuu qabanayaa hawlaha horumarinta daryeelka iyo ilaalinta khayraadka dabiiciga ah, wuxuuna shacabka ku baraarujinayaa, isuguna dubaridayaa hawlaha horumarinta.

j) Wuxuu dedejinayaa horumarka miyiga.

x) Wuxuu warbixin waxqabadka ah wakhti kastaba u gudbinayaa Golaha Xaafadda.

kh) Waxaa kale oo uu qabanayaa hawlaha kale ee looga xilsaaro Golaha xaafadda.

### Qod. 95^aad

### Magacaabista iyo Muddada Shaqo ee Guddoomiyaha Tuulada.

1. Guddoomiyaha xaafadda waxa doorasho lagaga dhex xulanayaa xubnaha Golaha tuulada.
2. Haddii aan si ka duwan loo dhigin, muddada shaqo ee Guddoomiyaha tuulada waa muddada shaqo ee Golaha Tuulada.

### Qod. 96^aad

### Awooda iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Tuulada.

1. Guddoomiyaha xaafaddu /wuxuu ka tirsan yahay Golaha tuulada iyo kolba sida ay xaaladu tahay maamulka Degmada ama magaalada xaafaddu ka tirsan tahay. Waa wakiilka tuulada, hoggaamiyaha hawlaha maamulka iyo Guddoomiyaha Golaha kaabineega.
2. Iyadoo sideeda ay tahay arrinta ku xuusan farqada 1^aad ee qodobkan Guddoomiyaha xaafaddu wuxuu leeyaha awoodda iyo waajibaadka hoos ku cad;

   b) Wuxuu shirinayaa, hoggaaminayaana Golaha hawlfulinta ee tuulada.

   t) Wuxuu hubinayaa, dabagelayaana in ay xaafadda ka hirgashay siyaasada, shuruucda, xeerhoosaadyada,

awaamiirta iyo qorsheyaasha ka soo baxa hay'addaha maamul ee ka sareeya.

j) Wuxuu Golaha tuulada gudbinayaa kana ansixinayaa magacaabista xubnaha kale ee Golaha maamulka tuulada oo uu ku jiro Gudoomiye ku xigeenka xaafaddu.

x) Wuxuu si loo magacaabo Golaha tuulada, u gudbinayaa faah-faahinta Garsooreyaasha musharixiinta ah ee Maxkamadda bulshada.

Qod. 97aad

Awoodda iyo Waajibaadka Guddoomiye ku Xigeenka Tuulada

Guddoomiye ku xigeenka xaafadda waxa soo xulaya Guddoomiyaha xaafadda magacaabistiisana ka ansixinaya Golaha tuulada, wuxuuna yeelanayaa awoodda iyo waajibaadka soo socda:

1. Wuxuu qabanayaa hawlaha si gaar ah ugu xilsaaraan Guddoomiyaha xaafadda iyo Golaha hawl-fulinta.
2. Marka aanu joogin Guddoomiyaha xaafaddu ama aanu shaqada qaban karaynin, ayuu isagoo matalaya hawlaha qabanayaa.
3) Guddoomiye ku xigeenka xaafaddu wuxuu hoostagayaa Guddoomiyaha tuulada iyo Golaha maamulka Tuulada.

Qod. 98aad

Maxkamadda Bulshada ee Tuulada.

1. Waxa Dastuurkan lagu dhisay Maxkamadda bulshada ee tuulada oo noqonaysa hay'adda Garsoorka bulshada ee xaafadda. Faahfaahinta sharci ayaa lagu soo saarayaa.
2. Garsooreyaasha Maxkamadda bulshada waxa loo

magacaabayaa sida ku cad **farqada** 3aad qodobka 91 ee Dastuurkan.

3. Muddada shaqo ee garsooreyaasha maxkamadda bulshadu wuxuu noqonayaa muddada shaqo ee Golaha Tuulada. Faah-faahinta sharci ayaa lagu soo saari doonaa.

## CUTUBKA TOBNAAD
## MABAADIDA SIYAASADEED EE DEEGAANKA

### Qod. 99aad
### Ujeeddooyinka

1. Hay'ad kasta oo ka tirsan dawladda deegaanka markay fulinayso dastuurka federaalka ama kan degaanka, sharciyada kale iyo siyaasaddaba waa inay bar tilmaameed cad ka dhigato cutubkan.
2. Cutubkan dhexdiisa ereyga Dawladda waxaa loola jeedaa Dawladda Deegaanka soomaalida.

### Qod. 100aad
### Ujeeddooyinka Siyaasadeed

1. Dawladda oo ku dhaqmaysa maabaadiida dimoqraadiga ah;waa inay shacabka soomaalida heer walba u diyaariso siduu iskii iskugu maamuli lahaa.

2) Dawladda Waxa xil ka saaran yahay xoojinta sinaanta iyo walaalnimada ka dhaxaysa Deegaanada kale.

## Qod. 101aad

## Ujeeddooyinka Dhaqaale

1. Dawladda waxa saaran xil culus oo ku wajahan sidii ay muwaadiniinta ugu jihayn lahayd ka faa'iidaysiga buuxa ee aqoonta iyo khayraadka dabiiciga ah ee dhulka.

2) Maadaama xuddunta dhaqaalaha deegaanku tahay khayraadka xoolaha waxaa dawladda xil ka saaran yahay marka la diyaarinayo siyaasadda iyo barnaamijyada horumarineed inay tixgeliso sidii xoolo dhaqatada nolol deggan loogu sameyn lahaa ayna uga faa'iideysan lahaayeen kaabayaasha dhaqaale.

3) Dawladda waxa xil ka saaran yahay xaqiijinta in Muwaadiniintu fursad siman u helaan koruqaadida xaaladahooda dhaqaale iyo gacan ka gaysashada sidii hantida loogu qaybin lahaa sinaan.

4) Dawladdu waxay dadaal adag u galaysaa iyadoo la kaashanaysa hay'addaha federaalka sidii dhaqaalaha de-egaanka loogu xidhi lahaa dhaqaalaha guud ee wadanka.

5) Dawladda deegaanku waxay dhiirigelinaysaa, tallaabooyin wax ku ool ahna ka qaadaysaa in maal-geliyeyaasha gaarka ahi ay ka qayb-qaataan horumarka deegaanka.

6) Dawladdu iyadoo dhulka iyo khayraadka dabiiciga ah ku haysa magaca dadweynaha, waxa xil ka saaran yahay inay ugu adeegto danta guud ee dadweynaha iyo horumarkoodaba.

7) Marka la dejinayo siyaasadaha iyo qorsheyaasha horumarineed ee deegaanka, Dawladda deegaanku waa inay ka qayb-gelisaa dadweynaha. Waana inay taageerto dhaq-dhaqaaqyada horumarineed ee ay wadaan.

8) Dawladdu iyaddoo isku gaynaysa xoogga, aqoonta iyo lacagta dadweynaha waa inay diyaarisaa tab lagu xaqiijinayo horumar deg-deg ah, waana inay dadweynaha ka siisaa doorka ugu balaadhan ee dhaq-dhaqaaqyada gorumarka dhaqaale, hase yeeshe iyadoon ku koobnayn diyaarinta siyaasadaha iyo qorsheyaasha oo keliya waa inay shacabka ka qayb-geliso fulinta iyo dabagalkoodaba.

9) Dawladdu waa inay diyaarisaa qaab ay haweenku si sinaan leh uga qaybqaataan dhaq-dhaqaaqyada bulsho, dhaqaaleed iyo siyaasadeed ee deegaanka.

10) Dawladdu waa inay xil culus iska saartaa arrimaha caafimaadka , nabadgalyada iyo kor u qaadida heererka nololeed ee shacabka iyo shaqaalahaba.

11) Dawladdu waxay dadaal adag u gelaysaa, kor u qaadida kobcinta dhaqaalaha iyo bulshada deegaanka ee hoosaysa.

## Qod. 102aad

## Ujeeddooyinka Bulshada

1) Hadba sida awoodda dalka iyo deegaankuba u saamaxdo waxa muwaadiniinta iyo qabiilada deegaankaba loo fidinayaa adeegyada waxbarasho, caafimaad, helid biyo nadiif ah, hoy, cunto iyo bad-baadada bulshada.

2) Waxbarashadu waa inay u socoto si ka madax banaan faragelinta diinta, siyaasada iyo saamayn kale oo dhaqameed.

3) Dawladdu waxay ku talaabsanaysaa ka hortagga masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dad sameega ah. Haddii ay dhacaana waxay dadkii ku waxyeeloobay u fidinaysaa gargaar deg-deg ah.

## Qod. 103aad

## Ujeeddooyinka Dhaqanka

1) Dawladda waxa saaran xilka kobcinta siman ee dhaqamada iyo caadooyinka dadweynaha deegaanka ee aan ka hor imanayn xuquuqaha aasaasiga ah, sharafta qofka iyo dimoqraadiyada ee Dastuurka Federaalka iyo Deegaanka ku astaysan.

2) Dawladda waxaa xil ka saaran yahay inay abuurto hay'addo faafiya, kobciyana khayraadka dabiiciga ah, dhaqanka, hidaha, taariikhda iyo luuqada deegaanka.

3) Dawladdu iyadoo ku xisaabtamaysa awoodeeda waa inay fidisaa suugaanta, culuunta sayniska iyo farsamooyinka casriga ah.

4) Dawladda deegaanka waxa xil ka saaran yahay abuurida xoog dhalinyaro oo jismi ahaan iyo caqli ahaanba dhisan oo ka madax banaan dhammaan maan-dooriyeyaasha kala duwan oo si firfircooni ah u hanan kara mas'uuliyada deegaanka mustaqbalka, isla markaana Dalkooda jecel, isku kalsooni buuxdana leh, una taagan shacabkooda.

## Qod. 104aad

## Ujeeddooyinka Ilaalinta Deegaanka

1) Dawladda waxa saaran waajib ah in muwaadin kasta oo deegaanka ku nooli helo, deegaan caafimaad iyo nadaafad leh.

2) Tallaabo kasta oo lagu kobcinayo dhaqaalaha deegaanka, waa inaanay deegaanka waxyeelo u gaysan.

3) Dejinta iyo fulinta siyaasadaha iyo barnaamiyada ku wajahan

deegaanka, waa in lagala tashado dadweynaha deegaanka ku nool.

4) Dawladda deegaanka iyo shacabka deegaankaba waxay u xilsaaran yihiin dhawrista deegaanka. Gaar ahaan si looga hortago, loona yareeyo waxyeelada nabaad-guurka, dawladu waxay qaadaysaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah.

## CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD

## QODDOBO KALA DUWAN

### Qod. 105aad

### Ku Dhawaaqida Xaalad Deg-Deg ah

1) Marka ay dhacdo masiibo dabiici ah ama dad samee ah ama cudur khatar gelinaya caafimaadka bulshada oo isla markaa aan Golaha xildhibaanadu shir ku jirin, golaha hawl-fulinta deegaanku waxay ku dhawaaqi karaan xaalad deg-deg ah.

2. Shan iyo toban cisho gudahood marka la hirgeliyo ku dhawaaqida xaalada deg-dega ah, Af-hayeenka Golaha xil-dhibaanadu wuxuu shir ugu yeedhaa, kana ansixiyaa xaalada deg-dega ah Golaha xildhibaanada.

3) Amarka deg-dega ah ee uu soo saaray Golaha hawl-fulinta degaanka ee uu ansixiyey Golaha xildhibaanadu, wuxuu shaqayn karaa lix bilood oo keliya. Hase ahaatee, marka Golaha xildhibaandu 3/4 (Afar dalool saddex) uu ku ansixiyo, xaalada deg-dega ah waxa la cusboonaysiin karaa afartii biloodba mar.

4) Amarka deg-dega ah ee uu soo saaray Golaha hawl-fulinta, isla markaana uu ansixiyey Golaha Xildhibaanada iyo tallaabooyin kasta oo la qaado, sinaba uma xakamayn karaan

xuquuqaha lagu xusay qodobada 15,[aad] 16,[aad] 17,[aad] 18[aad,] (1), 21[aad] (1), 25,[aad] 27[aad] (1), iyo 29[aad] ee dastuurkan.

### Qod. 106[aad]
### Guddiga Badhista ee Fulinta Xaalada deg-dega ah

1) Marka deegaanka lagaga dhawaaqo xaalad deg-deg ah, golaha xildhibaanadu wuxuu soo xulayaa toddoba xubnood oo sharci yaqaano iyo xubna goolaha isugu jirta oo ku magacaaban Guddiga baadhista fulinta xaaladaha deg-dega ah. Guddigan waxa la aasaasayaa wakhtiga Golaha xil-dhibaanadu uu ansixinayo xaalada deg-dega ah.

2) Guddiga baadhista fulinta xaalada deg-dega ah waxay yeelanayaan xilka iyo Waajibaadkan soo socda;

b) Waxay soo bandhigayaan bil gudaheed, magacyada shakhsiyaadka lagu xidhay xaalada deg-dega ah awgeed.

t) Waxay hubinayaan wakhtiga xaalada deg-dega ah lagu jiro tallaabada la qaadanayo inaanay ahayn qaar bini'aadminimada lidi ku ah.

j) Marka xaalada deg-dega ah lagu jiro tallaabooyinka lidiga ku ah bini'aadaminimada dadka ku talaabsaday ayuu guddigu hor keenayaa Maxkamadaha.

x) Guddigu marka uu aamino tallaabooyinka qaarkood inay lidi ku yihiin bini'aadaminimada ayaa waxay u soo bandhigayaan Madaxweynaha deegaanka ama Golaha hawl-fulinta ee Deegaanka si tallaabooyinkaas loo saxo.

kh) Wakhtiga xaalada deg-dega ah lagu jiro marka la isweydiiyo inuu sii socdo waxay ka dhiibanayaan fikirkooda.

## Qod. 107aad

## Hanti-dhawrka Guud

1) Hanti dhawrka guud ee deegaanka waxa lagu magacaabayaa soo dhawaynta Madaxweynaha Deegaanka, lagana ansixinayaa Golaha xildhibaanada deegaanka.
2) Hanti-dhawrka Guud wuxuu xaqiijinayaa in xafiisyada deegaanku iyo kuwa kaleba miisaaniyadii loo qoondeeyey sannadkaas in shaqooyinkii loogu talo-galay loo isticmaalay. Waxaanu warbixinteeda u soo gudbinayaa Golaha xildhibaanada deegaanka.
3) Hanti-dhawrka guud wuxuu miisaaniyadiisa si toos ah uga ansaxsanayaa Golaha xildhibaanada Deegaanka.
4) Hanti-dhawrka guud wuxuu hoos-tagayaa Golaha xildhibaanada deegaanka.
5) Awoodda iyo Waajibaadka shaqo ee hanti-dhawrka guud faahfaahinteeda waxa lagu go'aamin doonaa sharci.

## Qod. 108aad

## Soo Bandhigida dib u habaynta Dastuurka

soo bandhigida dib u habaynta dastuurku waxay suurto galaysaa;

1) Marka xubnaha Golaha xildhibaanada Deegaanka (1/3) saddex daloolow mid ay taageeraan.
2) Marka cod hal dheeri ah Golaha hawl-fulinta deegaanku ku taageero
3) Marka Golaha xildhibaanada degmooyinku Saddex

dalooloow mid (1/3) ay codsadaan.

## Qod. 109aad

## Dib u habaynta Dastuurka

1) Qodobada Cutubka labaad iyo saddexaad waxaa dib loogu habayn karaa sida ku cad qodobka 105aad ee Dastuurka federaalka.
2) Qodobada ka baxsan qodobkan farqadiisa koowaad waxa dib loo habayn karaa marka Golaha xildhibaanada de-egaanku ay ku ansixiyaan cod dhan 2/3(saddex meelood labo).

## Qod. 110aad

## Nuqulka Rasmiga ah

Nuqulka Afsoomaaliga ah ee Dastuurka ayaa leh aqoon-siga sharci ee rasmiga ah.